# DASTUURKA
# DAWLAD-GOBOLEEDKA PUNTLAND
# EE SOOMAALIYA

## NUQUL QABYA AH

## Horudhac

Qoralkani waa natiijadi wajigi koowaad ee dib u eegista Dastuurka Dawlad Goboleedka Puntland, waana qoraal qabya ah oo aan sina loogu qaadan Karin inuu rasmi yahay. Qoralkan waxaa loogu tala galay in wajiga labaad ee dib u eegista dastuurka lagu biiriyo talada dadweynaha markaas ka dibna la horgeeyo xukuumadda dawlad Goboleedka si ay ayaguna u go’aamiyan nuqulka kama dambaysta ah ee la horgeynayo Golaha wakiillada Puntland inta aan loo banhdigin afti dadweyne.

Waxaan halkan ugu mahad celinayaa Dawlad Goboleedka Puntland oo fulinta hawshan go’aamisay si weynna ugu hagar baxday. Waxaan kaloo u mahad celinayaa hay’adda Inter-peace oo wajiga koowaad ee hawshan gacan weyn ka geysatay dhaqaale ahaan iyo farsamo ahaanba.

Ugu dambaynti waxaan mahad ballaaran u celinayaa xubnaha Guddiga Dib u Eegista Dastuurka oo si weyn isaga xilsaaray xaqiijinta hadafkan iyo xoghayaha guddiga oo kaalin wax ku ool ah ka qaatay isku dubba rididda iyo diyaarinta Qoraalkan.

Guddoomiyaha Guddiga Dib U Eegista Dastuurka
Dawlad Goboleedka Puntland

Maxamad Xasan Maxamuud

# Madaxa I

# DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND IYO MABAADI'DA GUNDHIGGA U AH

## Qodobka 1aad

## MAGACA IYO HIMILADA

1. Magaca Dawladdu waa Dawlad-Goboleedka Puntland ee Soomaaliya.

2. Himilada Dawlad Goboleedka Puntland waa taabbagelinta nidaam dawladeed oo ku dhisan wadatashi, dimoqraadiyad, sinnaan iyo caddaalad bulsho una horseedi Kara dadkeeda nabad iyo xasillooni waarta iyo horumar dhinacwalba ah oo ku jihaysan kor u qaadidda heerka nololeed ee dhammaan muwaaddiniinta Puntland iyo ka qayb-qaadashada in himilooyinkaas ay gaaraan dhammaan dadka Soomaaliyeed.

## Qodobka 2aad

## SARRAYNTA SHARCIGA

1. Sharciga ayaa ka sarreeya cid kasta.

2. Dhammaan hay'adaha dawladda iyo dadweynuhuba waxay u hoggansamayaan sharciga

## Qodobka 3aad

## HANNAANKA XUKUNKA

1. Dawlad Goboleedka Puntland waa qayb ka mid Somaaliya, xil ayaana ka saaran hirgelinta dawlad Soomaaliyeed oo ku dhisan habka Federaaliga ah.

2. Awoodaha Dawlad Goboleedka Puntland ay ku wareejin doonto dawladda Federaalka ah ee Soomaliya iyo xuquuqaha ay yeelanayso Puntland waxa ay ku imaanayaan wada xaajood dhexmara dawladda federaalka ah iyo Dawlad Goboleedka Puntland.

3. Inta laga dhammaystirayo dastuur federaal ah oo afti dadweyne lagu meelmariyey, Puntland waxay lahaaneysaa awood dawlad madaxbannaan.

4. Talada kama dambaysta ah ee dalka waxaa leh dadweynaha waxayna u igmanayaan mas'uuliyiin ay u xilsaartaan si sharciga waafaqsan. Mas'uuliyiinta dalku waa adeegayaal shacbi xilkoodana waxay u gudan karaan oo keliya sida sharcigu farayo ama u banaynayo.

5. Qofna, kooxna ama qayb ka mid ah dadweynuhu uma adeegsan karaan xukunka dalka dano u gaar ah, kumana takrifalikaraan gooni ahaantood.

6. Hannaanka siyaasadeed ee dawladda waxaa gundhig u ah mabaadi'da:
   (a) Shareecada islaamka.
   (b) Dimuqraaddiyadda.
   (c) Maamul-wanaagga.
   (d) Wada-tashiga.
   (e) Danta guud oo laga horumariyo danta gaarka ah.
   (f) tartanka xisbiyada badan, iyo
   (g) xukunka oo lagu baahiyo dhulka oo dhan.
7. Puntland waxay aqoonsan tahay mabaadi'da aayo-ka-talinta ummadaha adduunka.
8. Puntland waxay taageereysaa in khilaafaadka caalamiga ah, kuwa cusub iyo kuwii hore u jireyba, lagu dhammeeyo wada hadal iyo hab nabadeed.

## Qodobka 4aad
## DADKA

1. Dadka Dawlad Goboleedka Puntland waa dadka leh jinsiyadda Puntland.
2. Qof kasta oo u dhashay ama ku dhashay Puntland waxaa loo aqoonsanayaa inuu leeyahay jinsiyadda Puntland.
3. Jinsiyadda waafaqsan faqradda labaad ee qodobkan waxaa dammaanad qaadaya sharciga.
4. Sharci gaar ah ayaa qeexaya sida lagu heli karo ama lagu waayi karo jinsiyadda Puntland.

## Qodobka 5aad
## TIROKOOBKA

1. Dadweynaha Punltland tobankii sanaba mar baa la tirokoobayaa.
2. Sharci gaar ah ayaa tilmaami doona wakhtiga iyo habraaca tirakoobka.

## Qodobka 6aad
## DHULKA IYO SOOHDIMAHA

1. Dhulka Puntland waxa uu ka kooban yahay gobollada Bari, Nugaal, Sool, Cayn, Heylaan, karkaar, gobolka Mudug oo laga reebay Deegaannada Hobyo iyo Xarardheere iyo Gobolka Sanaag oo laga reebay degmada Ceel-afweyn iyo waqooyi- galbeed ee degmada Ceerigaabo.
2. Soohdimaha Puntland waa kuwii Gobollada iyo Degmooyinka ay ka kooban tahay la lahaayeen derisyadooda Janaayo 1991 ka hor, isla markaas Puntland

waxay soo dhoweyneysaa lana xaajooneysaa degmo iyo gobol kasta oo doonaya inay ku soo biiraan Puntland.

3. Dhulka Puntland waxaa ku dhan hawada sare, berriga iyo dhulka hoostiisa, jiidda dhaqaalaha ee badda oo dhan 200 maylka badda ah oo ka bilaawda halka uu ku dhammaado hirka ugu dambeeya, waxaana mas'uul ka ah dawladda.

4. Midnimada dhulka Puntland waa muqaddas, lama kala qaybin karo lagumana xadgudbi karo.

## Qodobka 7aad
## AFKA

Afka-Soomaaliga iyo afka carabigu waa afafka rasmiga ah ee Dawlad Goboleedka Puntland, afka Ingiriisiguna waa afka labaad.

## Qodobka 8aad
## DIINTA

1. Diinta Islaamku waa tan qur ah ee dawlad-goboleedka Puntland ee Soomaaliya.

2. Diin aan tan Islaamka ahayn laguma fidin karo dalka Puntland, qawaaniinta iyo dhaqanka bulshadana waxaa saldhig u ah diinta Islaamka.

## Qodobka 9aad
## MAGAALO MADAXDA

1. Magaalo-madaxda dawlad-goboleedka Puntland waa Magaalada Garoowe waana fadhiga dhexe ee dawladda.

2. Magaalo-madaxda waxaa lagu dhaqayaa xeer u gaar ah.

## Qodobka 10aad
## CALANKA, ASTAANTA IYO HEESTA DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND

1. Calanka Puntland Waa (tartan furan)

2. Astaanta Dawlad Goboleedka Puntland waa (tartan furan)

3. Heesta Calanka waa (tartan furan)

# Madaxa II

# XUQUUQDA AASAASIGA AH IYO DAMAANAD-QAADKA QOFKA

## Qaybta 1aad
## XUQUUQDA SHAKHSIGA AH IYO LAALIDDEEDA

## Xubinta Koowaad
## XUQUUQDA SHAKHSIGA AH

### Qodobka 11aad
### SINNAANTA DADKA

1. Dhammaan dadku waa siman yahay Sharciga hortiisa.

2. Qofna laguma takoori karo midabka, diinta, dhalashada, jinsiyada, hantida, fikradda uu aaminsanyahay, siyaasada, afka iyo isirka.

3. Dastuurka ayaa dammaanad qaadaya xuquuqda dadka laga tiro badanyahay.

### Qodobka 12aad
### XORRIYADDA CAQIIDADA

1. Qof kasta xor ayuu u yahay Caqiidadiisa, lagumana khasbi karo mid kale.

2. Qofka muslimka ahi caqiidadiisa kama noqon karo.

### Qodobka 13aad
### XORRIYADDA FIKRIGA

1. Qof kasta xor buu u yahay fikraddiisa waana soo bandhigi karaa. Faaf-reeb horudhac ahi waa reebbanyahay.

2. Qofku waxa uu fikraddiisa ku cabbiri karaa qaab hadal, saxaafadeed, qoraal, muuqaal, suugaan iyo habab kale oo sharciga iyo anshaxa waafaqsan.

### Qodobka 14aad
### ASAASIDDA IYO KA-MID-NOQOSHADA URURRADA BULSHADA

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu asaaso, ka mid noqdo ama ka qayqaato hawlaha ururrrada dhaqan-dhaqaale, bulshadeed, Isboorti iyo cilmiyeed.

2. Aasaasidda ururradu waa inay waafaqsan yihiin qaanuunka dalka iyo danaha ummadda Puntland.

3. Waxaa reebban ururada leh dabeecad qabiil ama ciidan.

## Qodobka 15$^{aad}$
## XORRIYADDA DHAQDHAQAAQA

1. Qof  kasta waxa uu u madax-bannaan yahay inuu dalka ka maro ama ka dego meel kasta oo uu rabo iyo inuu dalka ka baxo kuna soo laabto goortii uu doono.

2. Sharci iyo xeer-hoosaadyo u gaara ayaa caddayn doona xadaynta xaqa dhaq-dhaqaaqa.

## Qodobka 16$^{aad}$
## LAHAANSHAHA HANTIYEED

1. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu hanti yeesho, u maamusho, ugana faa'iideysto si sharciga waafaqsan.

2. Sharciga ayaa qeexaya duruufaha iyo habraaca lagu xaddidi karo xaqa shakhsiga ee la xariira hantidiisa.

3. Xorriyadda wax soo saarku way bannaantahay,  waxaase shardi u ah in  wax soo saarayaashu ay oofiyaan shuruudaha sharci iyo maamul ee dalka u degsan.

4. Qofna lagama qaadi karo khidmad/kharash, hantidiisana lalama wareegi karo iyadoo aan loo cuskan sababo sharciga waafaqsan.

## Qodobka 17$^{aad}$
## NOLOSHA IYO NABAD-GELYEYNTA JIRKA

1. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay noloshiisa marka laga reebo qof lagu fuliyay xukun maxkamadeed oo kama dambays ah.

2. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay nabadgelyaynta jirkiisa iyo sharaftiisa.

3. Waxaa reebban denbiyada laga galo xaqa nolosha iyo nabadgelyada qofka sida xasuuq, jirdil, xarig iyo dil aan sharciga waafaqsanayn.

## Qodobka 18$^{aad}$
## MADAXBANNAANIDA QOFKA

1. Qofna madax-bannaanidiisa lagama qaadi karo, xannibaad kasta oo lagu sameeyana waa inay sharciga ku caddahay.

2. Addoonsiga iyo ka-ganacsiga dadku waa reebban yihiin.

3. Madax-bannaanida qofka waxaa shardi u ah in aaney ka hor imanayn shareecada islaamka, xeerarka, anshaxa guud, xasiloonida dalka ama xuquuqda qof kale.

## Qodobka 19aad

## MAGANGELINTA SIYAASADEED & ISU-CELINTA EEDAYSENEYAASHA/DENBIILAYAASHA

1. Qofka shisheeyaha ah oo weydiista magangelyo siyaasadeed waa la siin karaa, haddii uu buuxiyo shuruudaha u dhigan magangelinta, iyada oo la tixgelinayo heshiisyada caalamiga ah.

2. Waxaa reeban in muwaadin Puntland ah loo gacangeliyo dal kale.

3. Puntland way u gacan-gelin kartaa dalkii uu ka soo baxsaday denbiile ama eedaysane shisheeye ah haddii uu jiro heshiis isu-celin oo u dhexeeya Puntland iyo dalka weydiistay celintiisa.

4. Qofna looma dhiibi karo arimo siyaasadeed awgood.

## Qodobka 20aad

## AMMAANKA HOYGA

1. Hoyga iyo meelaha kale ee la degganyahay waxay leeyihiin xurmayntooda.

2. Ma bannaana baaridda, basaasidda iyo galidda hoyga amar Garsoore oo sababaysan la'aantiis, haddii aanu gelin hoyga qof dembiila ah oo ciidammadu ku raad-joogaan ama aanu isla wakhtigaas fal-dembiyeed ka dhacayn hoyga dhexddisa.

3. Waxaa waajib ah in si toos ah loogu akhriyo deggenaha amarka garsoraha inta aan lagu dhaqaaqin baarista, baarahana waxaa ka reebban ku-xadgudubka sharciga.

## Qodobka 21aad

## XAQA SAXAAFADDA

1. Saxaafadda iyo warbaahinta xorta ahi waa ay ka madax-bannaanyihiin faragelin dawladeed, waxayna u hoggaansamayaan sharciga oo keliya.

2. Xeer gaar ah ayaa faahfaahinaya nidaamka saxaafadda.

## Qodobka 22aad

## XORRIYADDA ISGAARSIINTA

Qofna lama faragalin karo waraaqihiisa boostada, xiriirkiisa isgaarsiineed iyo qoraalladiisa gaarka ah, marka laga reebo xaaladaha xeerku banneeyo

baaritaankooda, dabagalkooda, ama dhegaysigooda. Marka taas lagu tallaabsanayo waa inuu jiraa amar garsoore oo sababaysan.

## Qodobka23$^{aad}$

## BANNAANBAXYADA

1. Qof kasta waxa uu xor u yahay in uu abaabulo, ka qaybqaato bannaanbaxyo ku salaysan hab nabad-gelyo waase in uu sii wargeliyaa hay'adaha ay khusayso.

2. Bannaanbaxyada waxaa lagu joojin karaa sababo lid ku ah Diinta Islaamka, caafimaadka, anshaxa, amniga iyo xasiloonida dalka. Sharci ayaa tilaamamaya mas'uuliyidda iyo habraaca lagu joojin karo bannaanbaxyada.

## Qodobka 24$^{aad}$

## XAQA DACWADA IYO ISDIFAACA.

1. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu dacwad qaanuunka waafaqsan ka furto maxkamadda awoodda u leh.

2. Qof kasta waxaa uu xaq u leeyahay inuu iska difaaco maxkamdda horteeda.

3. Qof kasta oo aan iska difaaci karin maxkamdda horteeda, ama aan kari karin inuu qareen qabsado dawladda ayey waajib ku tahay in ay u qabato qareen difaaca.

4. U irkashada caddaaladdu waa lacag la'aan, haddii aan sharci gaar ahi bannayn.

## Qodobka 25$^{aad}$

## DEMBIGA IYO CIQAABTA

1. Ciqaabta dembi waxay ku koobnaanaysaa qofki geystay fal-dembiyeedka oo kaliya.

2. Qofna looma qaban/xiri karo, loomana ciqaabi karo fal markii uu galay aan dambi ku ahayn qaanuunka.

3. Ciqaab aan maxkamad ka soo bixin cidna laguma fulin karo.

## Qodobka 26$^{aad}$

## XUQUUQDA EEDAYSANAHA

1. Eedaysanaha waxaa loo aqoonsan yahay denbilaawe ilaa si qaanuunka waafaqsan maxkamadi ugu xukunto gelid denbi.

2. Eedaysanahuhu wuxuu xaq u leeyahay in la dhawro nabadgelyadiisa iyo sharaftiisa aadaminimo

3. Eedaysanaha laguma hayn karo meel aan qaanuunku bannayn.

4. Eedeysane kasta waa in 48 Saacadood gudahood lagu hor geeyo maxkamad.

5. Eedaysanaha waa in garsoore maxkamadda awoodda u lihi si tifaftiran ugu akhrido uguna macnayso dambiga lagu soo oogay.

6. Eedaysanuhu waxa uu xaq u leeyahay in ay soo booqdaan eheladiisa, qareenkiisa, dhakhtarkiisa iyo asxaabtiisa, waana la damiinan karaa haddii sharcigu oggol yahay.

7. Eedaysanuhu waxa uu xaq u leeyahay in uu qareen difaaca qabsado, haddii uusan awoodi karinna waa in ay dawladdu u qabato.

8. Eedaysanaha laguma khasbi karo qirashada dembiga loo haysto.

## Qodobka 27aad
## XUQUUQDA QOFKA XUKUMAN

1. Qofka ay maxkamadi xukuntay oo xiran waxa uu xaq u leeyahay ilaalinta nabadgelyadiisa iyo sharaftiisa aadaminimo.

2. Xukumanuhu waxa uu xaq u leeyahay in ay soo booqdaan eheladiisa, qareenkiisa, dhakhtarkiisa iyo asxaabtiisa.

3. Qodka maxbuuska ahi waxa uu xaq u leeyahay daryeel caafimaad, cunto iyo waxbarasho.

4. Qofka maxbuuska ahi waxa uu xaq u leeyahay xuquuqda caalamiga ah ee maxaabiista.

5. Xukumanuhu waxa uu xaq u leeyahay in uu racfaan ka qaato xukunkii maxkamaddu ku ridday.

# Xubinta Labaad
# LAALIDDA XORRIYADAHA MADANIGA AH

## Qodobka 28aad
## XAALADDAHA DEG-DEGGA AH.

1. Haddii ay dalka ka dhacaan dagaallo, weerar lagu soo qaado, gadood, masiibooyin dabiici ah, cudurro faafa iyo xasilloonida dalka oo qalalaase ku dhaco dammaanadaha ku cad qodobbada 13, 15, 20, 21, 22, iyo 23 si ku meelgaar ah waa loo laali karaa. Laalidda xuquuqda ku xusan qodobka 23 laguma dabbaqi karo Kulammada iyo bannaanbaxyada diimeed, dhaqan iyo isboorti.

2. Xaaladda deg-degga ah waxaa lagu soo rogi karaa dalka oo dhan ama qaybo ka mid ah.

3. Golaha wakiillada oo wareegto sharci ku soo saara ama Golaha Xukuumadda oo wareegto fulineed ku soo saara oo keliya ayaa soo rogi kara xaalad deg-deg ah.

4. Xaaladda deg-degga ah kama ay badan karto 30 beri , haddayse weli taaganyihiin xaladihi khasbay Golaha Wakiillada oo keliya ayaa cusboonaysiin kara muddo aan 30 beri ka badnayn.

5. Haddii ay suulaan duruufihii khasbay xaaladda degdegga ah amaba aan Golaha Wakiilladu cusboonaysiin xaaladda deg-deggu taagnaanmeyso.

# Qaybta 2aad
# XUQUUQDA BULSHADA

## Xubinta Koowaad
## QOYSKA

### Qodobka 29aad
### XUQUUQDA QOYSKA

Qoysku waa aasaaska bulshada oo ka aasaasma nin iyo haweenay qaangaaray oo si sharciga waafaqsan isku guursaday iyo carrurtooda, sharciga ayaana dammaanad qaadaya sugnaantiisa.

### Qodobka 30aad
### XAQUUQDA CARRUURTA

1. Carruur waxaa loola jeedaa qof kasta oo toban iyo shan (15) sano ka yar.

2. Ilmuhu waxa uu xaq u leeyahay nolol, magac, jinsiyad, korriimo iyo waxbarasho.

3. Waxaa reebban shaqada carruurta wax u dhimaysa noloshooda, dhaqankooda, korriimadooda iyo waxbarashooda.

4. Waxaa reebban in la soo rido ilmaha caloosha hooyada ku jira haddii aysan jirin xaalad adag oo hooyada nolosheeda khatar gelineysa, uuna caddeeyo dhakhtar aqoonteeda lihi.

### Qodobka 31aad
### WAXBARASHADA

1. Qof kasta xaq ayuu u leeyahay inuu wax barasho helo.

2. Horumarinta iyo baahinta wax barashadu waa waajib saaran Dawladda.

3. Dawladda ayaa u xilsaaran suulinta akhris iyo qoris la'aanta af Soomaaliga.

4. Wax-barashada asaasiga ee carruurtu waa khasab. Dawladda ayaa u xilsaaran helitaanka agabka iyo hawlwadeennada wax-barshada asaasiga ah. Marka duruuftu saamaxdana dawladdu waa inay gaarsiisaa dugsiyada sare.

5. Dawladdu waxay dhiirigelineysaa Jamciyadaha waxbarashada diimeed iyo kuwa maadiga ee gaarka ah.

6. Waa mas'uuliyadda dawladda diyaarinta iyo hubinta ku dhaqanka manhajka heerka dugsiyada hoose /dhexe iyo sare.

7. Barashada iyo tarbiyadda diinta islaamku waa dariiqad asaasi ah dhammaan heerarka waxbarashadana waa ku khasab.

8. Qofka qaangaarka ahi waa u madaxbannaan yahay doorashadiisa waxbarasho iyo xirfadeed, dawladdana waxaa waajib ku ah dhiirrigelinta wax-barashada dadka waaweyn iyo tan haweenka.

9. Waxaa la furan karaa Dugsiyo waxbarasho, kuwo xirfadeed iyo jaamacado gaar ah oo waafaqsan manhajka dawladda, kuna salaysan baahida iyo siyaasadda wax-barashada dalka.

10. Dawladda xil ayaa ka saaran horumarinta hiddaha iyo dhaqanka.

11. Dawladda waxaa waajib ku ah in ay taabbageliso tacliinta sare.

12. Xeer gaar ah ayaa nidaaminaya waxbarashada gaarka ah.

## Qodobka 32aad

## CAAFIMAADKA

1. Helitaanka adeegga caafimaadka guud, ka hor tag iyo daaweynba, ee dadweynaha waa mas'uuliyadda dawladda, carruurta iyo haweenkuna daryeel gaar ah ayey leeyihiin.

2. Dawladdu waxay mudnaan siinaysa tallaalka carruurta da'doodu ka yartahay shan (5) sano, waalidiinta iyo cid kasta oo gacanta ku haysa caruur waxaa waajib ku ah inay la kaashadaan hay'adaha caafimaadka.

3. Dawladda ayaa xil ka saaran yahay fulinta adeegga caafimaadka guud, waana inay taabbageliso hannaanka caafimaad ee dalka u degsan.

4. Dawladdu waxay oggoshahay daweynta caafimaad ee gaarka ah waxaana la furan karaa cusbitaallo iyo xarumo caafimaad oo gaar loo leeyahay. Adeeggaa caafimaad ee gaarka loo leeyahay waxaa nidaaminaya sharci gaar ah, dawladda ayaana kormeereysa.

## Qodobka 33aad

## AGOOMAHA, CURYAAMADA, GARAAD DHIMANKA IYO DADKA GABOOBEY

1. Agoomaha, curyaamada, garaad-dhimanka, dadka gaboobey iyo qof kasta oo aan is daryeeli Karin, cid daryeeshaana aaney jirin, dawladda ayay waajib ku tahay in ay daryeesho.

2. Dawladdu waa in ay dhiirrigelisaa, samaysaana hay'ado gaargaara dadka ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan.

3. Xeer gaar ah ayaa qeexaya dadka loo aqoonsanayo inaaney is daryeeli karin.

## Qodobka 34aad
## XUQUUQDA HAWEENAKA

Dawladda waxaa waajib ku ah horumarinta iyo dammaanad-qaadidda xuquuqda, madax-bannanida iyo kaalintooda bulsho, dhaqaale iyo siyaasadeed, si waafaqsan diinta Islaamka.

## Qodobka 35aad
## SHAQAALAHA

1. Dawladdu waxay u xil saaran tahay shaqo-abuurista iyo tayeynta tababarrada shaqaalaha.

2. Waxaa reebban shaqo khasab ah, haddii aan qaanuunku si kale u tilmaamin.

3. Shaqaale kasta waxa uu xaq u leeyahay mushahar u dhigma shaqada uu qabto.

4. Shaqaale kasta waxa uu xaq uu leeyahay maalin nasasho ah toddobaadkiiba, fasax sannadeed, fasax dhalmo oo u gaar ah haweenka iyo fasaxa ciidaha ee qaanuunku jideeyay, iyada oo aan xaquuqdiisa mushahar wax loo dhimin.

5. Dawladdu waa in ay daryeeshaa shaqaalaha jir ahaan iyo damiir ahaanba.

6. Shaqaalahu waxa ay xaq u leeyihiin in ay cabashadooda ku muujiyaan bannaanbax ama shaqo-joojin si xeerka waafaqsan. Ciidammada qalabka sida shaqa joojin ma samayn karaan.

7. Muwaadin kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu doorto shaqada iyo loo shaqeeyaha uu rabo.

## Qodobka 36aad
## BADBAADADA SHAQAALAHA

1. Dawladda ayaa dejinaysa sharciga shaqaalaha isla markaana samaynaysa hay'adaha dammaanad qaadaya xaqa hawlgabka shaqalaha gaarka ah iyo kan dawladdaba.

2. Qof kasta oo xil u haya dawladda oo ku dhaawacma shaqada, jirrada ama hawlgab noqda waxa uu xaq u leeyahay daryeel qaanuunka waafaqsan.

3. Xukuumaddu waxay shaqaalaha dawladda iyo kuwa gaarka ahba u dejineysaa hab dammanad-qaad shaqaale oo ay maalgeliyaan dawladda, loo shaqeeyaha iyo shaqaaluhuba.

# Qaybta 3aad
# MUWAADINIINTA IYO HABRAACA DOORASHOOYINKA

## Qodobka 37aad
## MUWAADINNIMADA

1. Qof kasta oo leh jinsiyadda Puntland da'diisuna gaartay 18 sano waa muwaaddin puntland.

2. Muwaadinka Puntland luminmaayo muwaddinnimidiisa haddii uu qaato jinsiyad dal kale.

## Qodobka 38aad
## XUQUUQDA MUWAADDINKA

Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay:

(a) Inuu ka qayb-galo doorashooyinka iyo inuu cod bixiyo.

(b) Inuu sameeyo ama ku biiro xisbi siyaasadeed.

(c) Inuu xilliyada doorashada u tartamo xilalka dalka.

## Qodobka 39aad
## XAQA BANDHIGIDDA CABASHADA

1. Muwaadin kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu cabashadiisa qoraal ugu diro Madaxweynaha, Barlamaanka, xukuumadda, iyo madaxda kale ee dawladda.

2. Xafiiska qoraalka cabashadu u socoto waa inuu kaga jawaabo (45) beri gudahood.

## Qodobka 40aad
## WAAJIBAADYADA MUWAADDINKA

1. Muwaaddin kasta waxaa waajib ku ah:

   (a) Codbixinta xilliga doorashooyinka.

   (b) Adkaynta midnimada umadda iyo ilaalinta jiritaanka qaranimada Puntland.

   (c) Dhawridda diinta islaamka, dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka.

   (d) Bixinta canshuuraha ku waajibay.

   (e) Ka-qaybgalka difaaca Puntland markii loogu yeero ama ay la soo gudboonaato.

2. Sharciga ayaa qeexaya ciqaabta lagu mutaysanayo gudasho la'aanta waajibaadka ku xusan qodobkan.

## Qodobka 41aad
## HAKINTA XUQUUQDA MUWAADDINKA

Xuquuqda muwaaddinka waa la hakin kara haddii ay dhacdo:

(a) In qofku ku jiro xabsi rumaan ah ama mid maxkamadi ku xukuntay. Hakinta xuquuqdu waxay taagnaanaysa ilaa iyo inta maxkamdi ka sii deyso xabsiga ama uu dhammaysto muddaddii xabsiga.

(b) In qofku yahay garaad dhiman.

(c) In maxkamadi caddayso inaanu qofku gudan karin xilalkiisa. Hakinta xuquuqdu waxay taagnaaneysa ilaa

(d) Inta maxkamadi ka caddaynayso in isla qofkaasi uu xilalkiisa gudan karo.

## Qodobka 42aad
## DOORASHOOYINKA

1. Muwaaddin kasta oo buuxiya shuruudaha doorashada wuxuu xaq u leeyahay inuu wax doorto lana doorto.

2. Xubnaha Golaha Wakiillada iyo Golayaasha Degmooyinka waa mansabyada dadweyynuhu tooska u dooranayaan.

3. U codaynta mansabyadaas waa inay u dhacdaa si dimiqaraaddi ah waafaqsanna nidaam sharci ah oo ay maamulayso hay’ad madax-bannaan oo leh awoodo dastuuri ah.

4. Codbixintu waxay noqonaysaa mid caam ah, dadku u simanyahay, shakhsi ah, qarsoodi ah, waxaana reebban in qof lagu farageliyo doorashada meesha uu codka marinayo.

5. Sharciga ayaa xaddidaya aagagga doorashooyinka ee Golaha Wakiillada iyo Golayaasha Degmooyinka. Nidaamka doorashooyinku wuxuu noqonaya saamiga xisbi kastaa ku yeelanayo Golayaasha mid u dhigma tirada codbixinta ee uu helo (proportional rapresentation). Tirada kuraasta uu gobol ku yeelanayo Golaha wakiillada iyo xubnaha golayaasha degmooyinka waxay ku xirraanaysaa hadba inta uu le’egyahay dadweynaha ku nool gobolka ama degmada.

6. Taariikhda ay qabsoomeyso doorashadu waxaa goynaya hay’adda doorashada, waase inaaney noqon laba bilood ka yar ama afar bilood ka badan dhammaadka muddada golayaasha markaas xilka haya.

7. Inta aan la guda gelin doorashooyinka waa inuu jiro sharci gaar ah oo lagu hagayo arrin kasta oo la xariirta doorasho dimuqaraaddi ah.

## Qodobka 43aad
## DADKA AAN IS SHARIXI KARIN

1. Dadka ka tirsan ciidammada qalabka sida ee aan hawlgabka ahayn iyo garsoorayaashu xubin kama noqon karaan xisbiyada siyaasadda, isumana sharrixi karaan doorashooyinka.

2. Hawlwadeennada dawladdu isma sharrixi karaan haddi aanay iska casilin xilalka ay hayaan. Sharciga doorashada ayaa sheegaya wakhtiga kama dambaysta ah ee ay tahay inay is casilaan haddii ay doonayaan inay tartanka doorashooyinka ka qayb-galaan.

## Qodobka 44aad
## XISBIYADA

1. Dawlad-goboleedka Puntland waxaa lagaga dhaqmayaa nidaamka xisbiyada badan.

2. Saddexda Uurur-siyaasadeed ee ugu codadka badan doorashada ugu horreysa ee Golayaasha Degaanka ayaa xaq u yeelanaya inay nooqdaan xisbiyada siyaasadeed ee sharciga ah. Isla markaana labadii xilli-doorasho ka dibba waxaa la furidoonaa tartan cusub ee ururro siyaasadeed.

3. Waxaa reebban xisbiyada iyo ururrada leh dabeecad ciidan, diineed ama qabiil.

4. Qofkii magac xisbi doorasho ku gala kuna guuleysta kursi, kadibna ka baxa xisbiga wuxuu luminayaa kursigii xisbiga ee uu ku guuleystey.

5. Hantida Qaranka ee si guud looga faa'iidaysto sida garoommada ciyaaraha, barxadaha iyo warbaahinta dawladda xisbiyadu si siman ayay ugu fushan karaan ololayaashooda siyaasadda iyo hawlahooda xisbi oo kaleba. Goobaha kale ee dawladda iyo hantida dawladda looma adeegsan karo hawlo xisbi iyo ololayaal doorasho.

6. Qof kasta oo lagu eedeeyo inuu hanti dawladeed u isticmaalay dano xisbi maxkamad ayaa la horgeynayaa.

**7.** Xeerar iyo habraacyo gaar ah oo uu curiyo golaha xukuumaddu barlamaankuna ansixiyo ayaa la cuskuniyaa jiritaanka iyo hawlaha xisbiyada siyaasadda.

## Qodobka 45aad
## SHURUUDAHA FURASHADA XISBI SIYAASADEED

1. Xisbina kama qayb-geli karo doorashooyin haddii aanu sharciyayn Guddiga Doorashada Puntland (GDP)

2. Si xisbi loo sharciyeeyo waxaa shardi ah inuu leeyahay barnaamij siyaasadeed iyo xeer hoosaad haga hawlihiisa.

3. Guddiga Doorashda Puntland ayaa ka baaraandegeya qoraallada xisbigu soo bandhigo, sida keliya ee lagu diidi karo sharciyaynta waa haddii barnaamijkiisa iyo xeer-hoosaadkiisa ay ka muuqdaan arrimo liddi ku ah dastuurka.

4. Shaarci gaar ah oo barlamaanku ansixiyay ayaa qeexaya dhaqangelinta qodobka 44.2, shurrudaha iyo habraacyada kale ee la xariira sharciyaynta ururrada siyaasadda.

5. Haddii saddexda xisbi ee sharciga ah midkood burburo ama la xiro, Guddiga Doorashada Puntland ayaa ururkii siyaasadda ee kaalinta afraad galay doorashooyinkii golayaasha degaanka ee ugu dambeeyey ugu yeeraya inuu noqdo xisbiga siyaasadeed ee kaalintaas buuxinaya.

# Madaxa III

# DHAQAALAHA

## Qodobka 46aad

## HANNAANKA DHAQAALAHA

Hannaanka dhaqaalaha ee Puntland waa in dhammaan dadka Puntland ay helaan nolol u qalanta karaamadooda bani-aadaminnimo, iyo in qof kastaa helo arrimaha lama huraanka ah, si waafaqsan mabaadi’da caddaladda bulshada.

## Qodobka47aad

## DHAQAALAHA SUUQA XORTA AH

1. Hannaanka dhaqaale ee Puntland wuxuu ku salaysanyahay suuqa xorta ah, wuxuuna dhirrigelinayaa, isla markaasna dammaanaqaadayaa maalgashiga waddaniga ah iyo kan ajnebiga ahba.

2. Hawlaha ganacsiga waxaa saldhig u ah tartanka xorta ah.

3. Sharciga ayaa dhirriigelinaya hagayana tartanka xorta.

## Qodobka 48aad

## KHAYRAADKA DABIICIGA AH

1. Khayraadka dabiiciga ah ee Puntland waxaa leh dadka puntland waxaana looga faa,iideysan karaa si sharciga waafaqsan.

2. Dawladda Puntland ayaa ka mas’uul ah ilaalinta iyo ka faai’iidaysiga kayraadka dabiiciga ah.

3. Dawladda puntland waxay heshiis la geli karta shirkado waddani iyo ajnebiba ah waxayna siin kartaa ruqsadda ka faa'iidaynta khayraadka dabiiciga ah.

4. Ruqsad kasta oo la xariirta ka faa'iidaynta khyraadka dabiiciga ah waa in Golaha Wakiilladu oggolaado muddadeeduna aaney ka badnaan 25 sano.

## Qodobka 49aad
## ILAALINTA DEEGAANKA

1. Dawladda iyo dadweynaha Puntland waxaa waajib ku ah ilaalinta, dhawrista iyo soo kabashada deegaanka.

2. Waxaa reebban nabaadguurinta deegaannada iyo sumaynta dhulka, hawada iyo badda.

3. Waxaa reebban Dhoofinta dhuxusha, xoolaha dhaddig iyo duur-joogta.

4. Degaan rasmi ah lagama samayn karo meel aan ku habboonayn.

5. Sharci gaar ah ayaa nidaamin doona ilaalinta deegaanka.

## Qodobka50aad
## KAALINTA DHAQAALAHA EE DAWLADDA

1. Dawladdu waxay dhiirrigelinaysaa horumarinta dhaqaalaha, waxayna kaashanaysaa dhaqaalaha gaarka loo leeyahay si kor loogu qaado wax soo saarka. Kobcinta ganacsatada heerka dhexe, wax-soo-saarayaasha yar-yar iyo iskaashatooyinku waxay yeelanayaan mudnaan gaar ah.

2. Dawladda ayaa ilaalineysa khayraadka dalka, waxayna dammaanad qaadaysaa in cid walba si sharciga waafaqsan oo joogtaysan uga faa'iidaysato.

3. Dawladdu waxay ilaalinaysaa awoodda wax-gadashada ee dadweynaha, gaar ahaan kuwa danyarta ah.

## Qodobka 51aad
## SHIRKADAHA WADAAGGA AH

1. Xukuumaddu waxay samayn kartaa, kana qayb-geli kartaa shirkado wadaag ah oo ay saamilay ka yihiin maalgeliyayaal waddani ah iyo kuwa ajnebi ahba.

2. Madaxda shirkadaha wadaagga ah waxaa isla magacaabaya wasaaradda hawlaheedu la xariiraan iyo saamileyda gaarka ah.

### Qodobka 52aad
### GADIDDA HANTIDA UMMADDA

1. Wareejnta hanti kasta ee dawladdu leedahay waa in la mariyo habraac sharciga waafaqsan.

2. Lama iibin karo hanti ummadeed haddii aanay dawladdu dhinac ka ahayn.

3. Iibinta hanti dawladeed oo lagu qiimeeyay Sh.So. shan boqol oo malyan wax ka yar waa inuu oggolaado Madaxweynaha ama wasiirka qaabilsan. Iibinta hanti kasta oo qiimeheedu gaarayo Sh.So.Hal bilyan ansax ma aha haddii aanu oggolaan Golaha Xukuumaddu. Hanti kasta oo qiimeheedu ka badanyahay Sh.So.Hal bilyan iibinteedu waxay u baahanaysaa oggolaanshaha Golaha wakiillada.

### Qodobka 53aad
### QARAMAYNTA HANTIDA GAAR-AHAANEED

1. Hantida qofku ku helay si xeerka waafaqsan waxaa loola wareegi karaa dan guud oo keliya, iyadoo isla markaana la bixinayo magdhow munaasib ah.

2. Xeer ayaa xadaynaya hantida gaarka ah ee loola wareegi karo dan guud.

# Madaxa IV
# NIDAAMKA SIYAASADDA IYO HAY'ADAHA AASAASIGA AH EE DAWLADDA

## Qaybta 1aad
## NIDAAMKA DAWLADDA

### Qodobka 54aad
### NIDAAMKA BAARLAMAANIGA

Qaabka xukunka ee Dawlad Goboleedka Puntland waa baarlamaani

### Qodobka 55aad
### SADDEXDA QAYBOOD EE DAWLADDA

Saddexda qaybood ee dawladdu waxay kala yihiin:

(a) Golaha Wakiillada.

(b) Golaha Fulinta oo ah Xukuumadda.

(c) Golaha Garsoorka.

### Qodobka 56aad
### KALA SOOCNAANTA QAYBAHA DAWLADDA

1. Qayb kastaa waxay u madaxbannaan tahay gudashada waajibaadyada, xilalka iyo awoodaha dastuurku u jideeyey, qaybina qaybta kale ma hoos timaaddo, marka laga reebo arrimo gaar ah oo dastuurku si cad u qeexo.

2. Fulinta waajibaadka iyo xilalka qaybi leedahay qayb kale waa ka reebbantahay.

3. Qofna xubin kama noqon karo, isku mar, qayb ka badan saddexda qaybood ee dawladda.

### Qodobka 57aad
### ISKAASHIGA QAYBAHA DAWLADDA

Iskaashiga iyo wadashaqaynta saddexda qaybood ee dawladdu waa waajib dastuuri ah waxaana meelmarinaya qayb walba masu'uulka madaxa u ah.

## Qaybta 2aad
## XEER-DEJINTA

## Xubinta Koowaad
## GOLAHA WAKIILLADA

### Qodobka 58aad
### GOLAHA WAKIILLADA

1. Awoodda Xeer-Dejinta ee Puntland waxaa leh Golaha Wakiilladda oo matala shacabka Puntland oo dhan.

2. Golaha Wakiilladu waxa uu ka kooban yahay 66 xildhibaan oo dadweynuhu ku soo doorto codbixin caam ah.

3. Muddada Golaha Wakiilladu waa shan sano (5) laga bilaabo maalinta natiijada doorashada lagu dhawaaqo. Xildhibaanka golaha wakiillada dib ayaa loo dooran kara

4. Golaha Wakiilladu waxa uu si rasmi ah u dhismayaa 30 maalmood guduhood laga bilaabo maalinta natiijada doorashadu soo baxdo.

## Qodobka 59aad

## SHURUUDAHA LAGU SOO DOORANAYO GOLAHA WAKIILLADA

Golaha Wakiillada waxaa loo dooran karaa qof kasta oo buuxiya shurrudaha soo socda:

(a) Golaha Wakiillada waxaa loo dooran karaa qof kasta oo ah Muwaadin Puntland, xilkas ah, miyirkiisu dhan yahay, da'diisuna aanay ka yarayn shan iyo labaatan (25) sano.

(b) Qof kasta oo aan xuquuqdiisa muwaadinnimo go'aan maxkmadeed lagu hakin shantii(5) sano oo ugu dambaysay waa loo dooran karaa xildhibaan Golaha Wakiillada.

(c) Murashaxa Golaha wakiilladu waa inuu leeyahay ugu yaraan aqoon dugsi sare ama waayo aragnimo u dhiganta.

(d) Ka hor inta aan qofka la oggolaan murashaxnimadiisa, Guddiga Doorashadu waa inuu hubiyo in musharraxu buuxiyey shurrudaha ku cad qodobkan.

## Qodobka 60aad

## SHURUUDAHA LAGU LUMIYO XILKA GOLAHA WAKIILLADA

1. Xubinimada Golaha Wakiiladda waxaa lagu waayi karaa haddii xubintu:

    (a) Geeriyooto ama ay la soo gubonaato xaalad xilgudasho la'aaneed oo joogta ah.

    (b) Istiqaalad Golaha keento Goluhuna ka aqbalo.

    (c) Ka maqnaato labo kal fadhi oo caadi ah iskuna xiga ayada oo aanay jirin sabab maangal ah.

    (d) haddii la hakiyo xuquuqdiisa muwaaddinnimo.

2. Haddii xubin ka mid ah Golaha Wakiillada lumiso xubinnimadeeda waxaa baddalkeeda soo galaya qofka doorashaddii hore xubin suge u ahaa.

3. Sharciga doorashada ayaa caddaynaya habraaca loo marayo xulashada xubin sugaha, waana in lagu dhaariyo 30 beri gudohood laga bilaabo malinta xildhibaanka uu beddelayaa lumiyay xubinnimada Golaha Wakiillada.

## Qodobka 61aad

## HAB-RAACA HAWLAHA GOLAHA

1. Golaha wakiilladu, fadhiga ugu horeeya waxa uu iska dhex-dooranayaa afhayeen iyo laba ku xigeen oo kala ah koowaad iyo labaad.

2. Kal fadhiga koowaad ee golaha, waa in lagu meel-mariyo xeer-hoosaadka lagu socodsiinayo hawlaha golaha.

3. Goluhu wuxuu yeelanayaa kal fadhiyo loo dhanyahay si uu uga doodo, u oggolaado, ama u diido arrimaha la hor geeyo.

4. Fadhiyada loo dhanyahay ee goluhu waa u furan yihiin dadweynaha, haddiise ay xukuumaddu codsato ama hoggaaminta goluhu u arko in ka doodidda arrin ay u baahanatahay inay golaha ku koobnaato, goluhu wuxuu go'ansan karaa inuu ka yeesho fadhi albaabadu u xiranyihiin.

5. Hogganka goluhu wuxuu xildhibaannada u kala qaybinayaa guddi-hoosaadyo u kala xilsaaran arrimaha golaha la horgeynayo si uu go'aan uga gaaro.

6. Guddi-hoosaadyadu waa inay isugu dheellitiranyihiin xoogagga siyaasadda ee uu ka koobanyahay goluhu, waxayna u xilsaaranyihiin lafaguridda, diyaarinta, iyo soo jeedinta arrimaha goluhu ka doodayo. Fadhiyada golaha waxaa la hor-geeyaa arrimaha ay guddi-hoosaadyadu isku raacaan oo kaliya.

7. Arrimaha go'an gaaris deg-degga u baahan goluhu si toos ah ayuu u guda-geli karaa ayada oo aan la marin guddi-hoosaad, tallaabada noocaas ahna waa in goluhu cod ku meelmariyo.

8. Goluhu wuxuu iska dhex-dooranayaa guddi joogta ah oo ururiya howlaha golaha labada kal fadhi dhex-dooda.

9. Goluhu wuxuu yeelanayaa xog-haye joogto ah, oo aan xubin ka ahayn golaha wakiillada.

10. Goluhu waxa uu yeelan karaa la taliyayaal iyo karaaniyaal isku dubbarrida doodaha iyo warbixinnada guddi-hoosaadyada .

11. Kooramka fuuritaanka kal-fadhiyada, fadhiyada, iyo go'aan gaarista Goluhu waa kala bar iyo hal xubnaha Golaha iyo guddi-hoosaadyadaba. Dastuurka ayaa caddaynaya mararka koorum kale loo baahanayo.

12. Habka codaynta Goluhu waa gacan taag marka laga reebo arrimaha dastuurku si gaar ah u tilmaamo. Gacan taagga waxaa lagu beddeli kara habka codaynta elektarooniga ah marka goluhu yeesho.

## Qodobka 62[aad]

## AWOODAHA GOLAHA WAKIILLADA

Golaha Wakiilladu wuxuu leeyahay awoodaha iyo xilalka soo socda:

1. Oggolaanshaha, diidmada, wax-ka-beddelidda, iyo burinta sharicyada puntland.

2. Inay fasiraad sharci iyo mid guud ku sameeyaan sharci kasta oo uu ka dhasho mugdi ama is-maandhaaf.

3. Inay ku dhawaaqaan inuu sharci ka tarjumayo baahi guud.

4. Inay ku dhawaaqaan xaalad dagaal iyo meelimarinta heshiis nabadeed.

5. Inay ansixiyaan heshiis caalami ah oo dawladda Puntland ay dhinac ka tahay. Ansixinta heshiisyada caalamiga ah waxay u baahanayaan cod dhan saddex-meelood labo (2/3) xubnaha golaha.

6. Inay cod saddex-meelood laba (2/3) ee xubnaha golaha ku ansixiyaan heshiis amaah qaadasho ee puntland la gasho amaahiye ajnebi ah.

7. Ansixinta degmo ama gobol cusub haddii xukuumaddu soo jeediso.

8. Inay ka doodaan, naqdiyaan, waxna ku biiriyaan siyaasadaha dawladda

9. Dabagalka iyo hubinta dhaqan-gelidda sharciyada goluhu ansixiyo.

10. inuu cod saddex-meelood laba (2/3) xubnaha golaha ku doorto Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka labada wareeg oo hore ee codbixinta. Hadii labada wareeg ee hore ay u tartamayaasha jagada madaxweynuhu ku kala hari waayaan wareegga saddexaad wuxuu goluhu ku kala saarayaa cod hal dheeri ah. Doorashda Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-Xigeenka waxay ku dhacaysaa cod qarsoodi ah.

11. Doorashada hawl-wadeennada sar-sare ee kala ah: Difaacaha Xuquuqda Aadanaha, Labada xubnood ee ka mid noqonaya Guddiga Doorashada Puntland, iyo labada garsoore oo ka mid noqonaya Maxkamadda Dastuuriga ah. Goluhu wuxuu ku dooranayaa qaabka ku dhawaaqidda magacyada.

12. Inay oggolaadaan hawl-wadeennada Golaha fulintu magacaabo dastuurkuna farayo inay u baahanyihiin ansixinta Golaha Wakiillada. Hawl-wadeennada Golaha Fulintu magacaabo hawshooda way bilaabi karaan marka madaxweynuhu ogeysiiyo xil-magcaabiddooda. Golaha wakiilladu haddii aanu muddo saddex bilood gudahood ah aanu u codayn in la ansixiyo waxay la mid noqonaysaa inay ansixiyeen.

13. Ansixinta barnaamijka wax qabad ee dawladda.

14. Inay oggolaadaan ama wax ka beddelaan misaaniyad sannadeedka xukuumaddu hor-keento iyo is-beddel kasta oo isla xukuumaddu dib kaga samayso. Goluhu ma kordhin karo ku talagalka kharashka ee miisaaniyadda. Haddii ay Golaha la noqoto in miisaaniyadda la dhimo waa inuu wargeliyo Golaha Fulinta la tashina kala yeesho inta aanu cod u qaadin. Haddii Golaha Fulintu jawaab celin ka bixin waayo tala soo jeedinta Golaha Wakiillada toban beri gudohood waxay la mid noqonaysaa inuu oggolaaday.

15. Inuu oggolaado xisaab xirka miisaaniyad sanadeedkii hore ee uu soo bandhigay Hanti Dhawrka Guud, isla markaasna u gudbiyo Golaha Fulinta talooyin la xariira fulinta ku dhaqanka miisaaniyadda ama wax ka beddelidda sharciyadda maaliyadda dawladda.

16. Inuu oggolaado canshuuraha iyo dhaqaale kasta oo xukuumadda ka qaadeyso dadweynaha iyo cashuuraha golayaasha degaanku gaar ahaantooda u qaadanayo inta aan lagu dhaqmin ka hor.

17. Inuu oggolaado hindisayaasha xukuumadda ee la xariira curinta, dhimidda ama wax ka beddelidda jagooyinka hawl-wadeennada dawladda iyo u kala astaynta mushaharooyinka.

18. Inuu oggolaado jaheeyana lacagta dalku leeyahay.

19. Inuu soddon beri (30) gudohood ku oggolaado ama ku diido haddii xukuumaddu soo saarto wareegto xaalad deg-deg ah. Haddii wareegtada xaaladda deg-degga ah ee dawladda goluhu diido, waxay noqonaysaa waxba kama jiraan, hase ahaatee hawlihii dawladdu ku tallabsatay maalmihii ka horeeyay diidmada Golaha lana xariiray wareegtada xaladda deg-degga ah waxay noqonayaan ansax, haddii aan maxkamadda dastuuriga ahi ku dhawaaqin inay liddi ku yihiin dastuurka.

20. Inuu ku ansixiyo kala bar iyo hal Xukuumadda Madaxweynuhu magacaabo marka muddada xilhayntiisu bilaabato, ama uu gebi-ahaantood ama qaarkood beddelo. Marka la hor geeyo golaha la magacaabay ama wasiiro cusub, golaha wakiilladu waa inuu kaga doodo una codeeyo muddo laba toddobaad gudahood ah. Haddii golaha wakiilladu gabo xilkaas waxay la mid tahay inuu ansixiyey.

21. Inuu u yeero wasiirrada ama madaxda hay'adaha madaxa bannaan si ay su'aalo uga weydiiyaan warbixinna uga helaan arrimaha golaha ama guddi-hoosadyadiisu danaynayaan. Haddii mas'uulku cudur daar la'aan ka baaqsado inuu hor tago golaha ama guddi-hoosaadyadiisa, fadhiga guud ee goluhu wuxuu u qaadayaa codka kalsooni kala noqoshada mas'uulkaas.

22. ka xayuubinta xasaanadda mas'uul kasta oo xasaanad leh, haddii uu xeer-ilaaliyaha guud soo hordhigo caddayn ay ku qancaan oo la xiriirta gelid faldambiyeed culus. Xil-ka-qaadidda Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenku waxay u baahanaysaa aqlabiyad gaar ah.

23. Haddii xubin Golaha Wakiillada ka mid ah ama mas'uul ay doorteen la qabto asaga oo denbi culus faraha kula jira, boolisku wuxuu wargelinayaa guddoomiyaha golaha wakiillada, hoggaanka Golaha ayaana go'aan ka gaaraya meesha lagu haynayo tan iyo inta la dhammaystirayo habraaca lagu go'aaminayo in xasaanadda laga qaado iyo in kale.

## Qodobka 63$^{aad}$
## KAL-FADHIYADA GOLAHA WAKIILLADA

1. Golaha wakiiladu waxa uu yeelanayaa labo kalfadhi oo caadi ah sanadkiiba, kuna kala aadan bilaha Juun iyo Oktoobar.

2. Kalfadhiga aan caadiga ahayn, waxaa isugu yeeri kara gudoomiyaha golaha wakiillada, codsi ka yimaada M/weynaha ama 1\4 xubnaha golaha wakiillada, iyaga oo dhammaan codsi qoraal ah oo sababaysan ku soo dalbanaya.

## Qodobka 64aad

## KALA DIRIDDA GOLAHA WAKIILLADA

1. Golaha Wakiillada waxaa la kala diri karaa markii:
   (a) Ay is casilaan aqlabiyadda golaha wakiilladu.
   (b) Goluhu fariisan waayo labo kalfadhi oo isku xiga sabab la'aan.

2. Markii ay dhacaan qaar ka mid ah ama dhamaantood arrimaha ku xusan. faqradda 1aad xarfaha a & b Madaxweynuhu wuxuu maxkamadda dastuuriga ah u gudbinayaa qoraal uu ku dalbanayo sugnaanshaha arrimaha ku xusan faqradda 1aad.

3. Markii ay u caddaato maxkamadda dastuuriga ah gelidda faqradda 1aad xarfaha b iyo t waxay Madaxweynaha u gudbineysaa in ay sugnaatay eedeynta lagu soo oogey golaha wakiillada.

4. Madaxweynuhu marka uu helo caddaynta maxkamadda dastuuriga ah wuxuu soo saarayaa go'aanka kala dirista golaha, wuxuuna ku dhawaaqayaa, in gole cusub lagu soo doorto muddo 45 casho gudohood ah.

## Qodobka 65aad

## KALSOONI KALA-NOQOSHADA WASIIRRADA

1. Golaha wakiilladu wuxuu kalsoonida kala noqon karaa wasiirada mid-mid ama wadar.

2. Kalsooni kala noqoshada wasiiradda waxaa soo jeedin kara ugu yaraan 6 xildhibaan.

3. Ka doodidda moshinka kalsooni kala noqoshada wasiirada mid iyo wadarba ugu yaraan waa inay oggolaadaan saddex meelood oo meel (1/3) xubnaha golaha wakiillada.

4. Xukuumaddu waa dhacaysaa haddii ay u codeeyaan kalsooni kala noqshada wasiirada kala bar iyo hal tirada guud ee xubnaha golaha wakiiladu.

5. Haddii cod kalsooni kala noqosho uu meel-maro, Madaxweynuhu waa inuu magacaabo beddelka golihii ama wasiirkii codka kalsoonida waayey. Haddii Golaha Xukuumaddu dhamaantiis waayo kalsoonida waxay sii wadaayaan hawl-maalmeedka caadiga ah tan iyo inta madaxweynuhu ka magacaabayo gole cusub, hase ahaatee kuma tallaabsan karaan hindisayaal cusub.

6. Haddi Golaha Xukuumaddu dhaco Madaxweynuhu waa inuu Golaha wakiillada horgeeyo Gole Cusub muddo aan ka badnayn soddon(30) maalmood.

# Xubinta Labaad
# HABRAACA SHARCI SAMAYNTA

## Qodobka 66aad
## CURINTA SHARCIYADA

Golaha wakiillada waxaa mashruuc sharci horgeyn kara oo keliya:

(a) Xil-dhibaan kasta oo golaha xubin ka ah.

(b) Madaxweynaha oo uu weheliyo wasiirka uu sharcigaasu hawlihiisa la xariiro.

(c) Maxkamadda sare, gaar ahaan arrimaha khuseeya mamulka garsoorka.

(d) Guddiga Doorashada Puntland, gaar ahaan arrimaha la xariira doorashooyinka iyo xisbiyada siyaasadda.

(e) Golayaasha Degmooyinka, arrimaha la xariira cashuuraha dawladaha hoose.

(f) Tiro muwaddiniin ah oo aan ka yarayn (5,000) shan kun oo qof oo cod bixiyeyaal ah.

## Qodobka 67aad
## SHURUUDAHA SHARCI CURINTA MUWAADDINIINTA

1. Muwaaddin kasta oo ka mid ah koox sharci u bandhigeysa Golaha Wakiillada waa in la hubsado warqaddiisa aqoonsiga ama ugu yaraan magaciisa, da'diisa, saxiixiisa, iyo inuu caddeeyo inuu yahay muwaaddin puntland.

2. Codsiga muwaaddiniinta waa inuu la socdo mashruuca sharci ee ay horgeynayaan Golaha, iyo cinwaan laba qof oo lagala soo xariiro.

3. Mashruuc sharci oo ku saabsan cashuuraha, difaaca dalka iyo ammaanka gudaha muwaaddiniintu ma horgeyn karaan Golaha Wakiillada.

4. Golaha waxaa waajib ku ah inuu kal-fadhiga markaas u socda ama kan ku xiga uu kaga doodo mashruuc sharci, marka ay sugnaadaan shuruudaha ku xusan faqradaha 1,2,3 ee qoodbkan jawaabna siiyaan ciddii soo jeedisay mashruucaas.

## Qodobka 68aad
## DOODDA GOLUHU KA YEESHO MASHAARIICDA SHARCIYADA

1. Golaha Wakiilladu mashruuc sharci oo kasta waa inuu qodob qodob uga doodo uguna codeeyo.

2. Sharci kasta oo goluhu meel-mariyo waa in laga sameeyo saddex nuqul oo rasmi ah oo ay saxiixaan hoggaanka goluhu loona diro Madaxweynaha

## Qodobka 69aad

## SAXIIXA MADAXWEYNAHA IYO FAAFINTA

1. Madaxweynuhu mudda soddon(30) beri gudohood ah waa inuu ku saxiixo sharci kasta oo Golaha Wakiilladu u soo gudbiyo ama uu isla muddadaas gudaheeda ku ogeysiiyo Golaha wakiillada inuu diiddanyahay.

2. haddii Madaxweynuhu aanu diidma ka muujin waa inuu saxiixo, nuqulna u diro Golaha wakiillada isla markaasna amro in faafinta rasmiga ah lagu soo saaro, nuqulna lagu kaydiyo madaxtooyada.

3. Sharci kasta oo goluhu u arko dan guud oo deg deg ah, Madaxweynuhu waa inuu ku saxiixo shan iyo toban(15) beri gudohood isla markaasna lagu soo saaro faafin rasmi ah ama diidma qayaxan ku celiyo.

4. Sharci wuxuu dhaqan gelayaa 15 beri ka dib marka lagu soo saaro faafinta rasmiga ah marka laga reebo kan danta guud oo dhaqan gal noqonaya isla maalinta faafinta rasmiga ah lagu soo saaro.

5. Haddii uu sharci ku jiro gacanta madaxweynaha mudda soddon(30) beri ka badan iyada oo aan la faafin, hoggaanka goluhu wuxuu amrayaa in lagu soo saaro warbaahinta qoraalka ah ee dalka.

## Qodobka 70aad

## DIIDMADA QAYXAN EE MADAXWEYNAHA

Madaxweynuhu wuxuu awood u leeyahay inuu diidmada qayaxan isku hor taago sharci uu meel-mariyay Golaha Wakiilladu isaga oo qoraal sababaysan ku wargelinaya Golaha Wakiillada waxa uu ku diiddan yahay.

## Qodobka 71aad

## JEBINTA DIIDMADA QAYAXAN

1. Diidmada qayaxan ee Madaxweynaha waxaa Golaha wakiilladu ku jebin karaan markii ay isla sharcigaas mar labaad u codeeyaan kuna meel-mariyaan aqlabiyad 2/3 ah ee xubnaha golaha.

2. Marka goluhu jebiyo diidmada qayaxan ee Madaxweynaha, hogganka golaha ayaa isla sharcigaas u gudbinaya Madaxweynaha iyaga oo raacinaya qoraal ay si rasmi ah ugu sheegayaan jebinta diidmadiisii qayaxnayd.

3. Isla sharcigaas madaxweynuhu waa inuu ku faafiyo mudda shan iyo toban (15)beri gudohood ah.

## Qodobka 72aad

## DIB UGA DOODIDDA MASHRUUC SHARCI OO GOLUHU DIIDAY

Haddii Goluhu diido mashruuc sharci dib looguma soo celin karo isla kal-fadhiga markaa socda.

# Qaybta 3aad
# FULINTA

## Qodobka 73aad

## QEEXIDDA QAYBTA FULINTA

1. Qaybta fulinta ee Dawlad Goboleedka Puntland waxay ka koobantahay Madaxweynaha, Madaxweyne Ku-Xigeenka, Wasiirrada, Wasiirro Ku-Xigeennada iyo dhammaan hawlwadeennada iyo shaqaalaha mas'uuliyaddooda hoos yimaada.

2. Qaybta fulinta ee dawladdu waxay u qaybsantaa dawladda dhexe, maamulka gobollada iyo degmooyinka.

3. Qaybta fulinta ee dawladdu waxaa haga Madaxweynaha ama Madaxweyne ku xigeenka haddii uu madaxweynuhu maqanyahay.

## Qodobka 74aad

## GOLAHA FULINTA

Golaha fulintu wuxuu ka kooban yahay Madaxweynaha, Madaxweyne Ku-Xigeenka, Wasiirrada iyo Wasiir Ku-Xigeennada.

## Qodobka 75aad

## AWOODAHA IYO XILALKA GOLAHA FULINTA

Golaha Fulintu wuxuu leeyahay xilalka soo socda:

1. Dejinta iyo hirgelinta istaraatiijiyadda siyaasadda dalka ee la xariirta aminga, dhaqaalaha, iyo horumarinta bulshada.

2. Meel-marinta xeer-hoosaadyada qaybta fulinta ee dawladda.

3. Oggolaanshaha mashruuca miisaaniyadda dawladda oo ay ku dhanyihiin dhammaan dakhliga xukummaddu filayso inuu soo gelayo iyo faahfaahinta kharashyada sannad maaliyadeedka oo ay ku jiraan mushaharooyinka iyo jagooyinka hawlwadeennada dawladda, ayna u bandhigaan Golaha Wakiillada.

4. Oggolaanshaha wareegtada xalladda degdegga ah isla markaasna ay wargeliyaan Golaha wakiillada.

5. Oggolaanshaha ku dhawaaqidda xaalad deg-deg ah.

6. Oggolaanshaha iyo abuuritaanka wakaalado madax bannaan.

7. Magacaabidda Xeer-Ilaaliyaha guud, hantidharaha guud, Guddoomiyaha Bangiga dhexe iyo mid ka mid ah Garsoorayaasha dadweynaha ee maxkamadda dastuuriga ah ayna oggolaansho u weydiiyaan Golaha wakiillada magacaabiddooda.

8. Inay ka baaraandegaan go'aanna ka gaaraan arrin kasta oo Madaxweynuhu u soo bandhigo.

## Qodobka 76aad
## HABRAACA GOLAHA FULINTA

1. Shuruudaha la doonayo inuu buuxiyo qof kasta oo loo magacaabayo wasiir ama Wasiir- ku-xigeen waxay la mid yihiin kuwa xubinta Golaha Wakiillada oo ay u raacdo heer aqooneed oo gaarsiisan ugu yaraan Jaamacad iyo waayo aragnimo la xiriirta howsha wassaaradda loo magacaabo.

2. Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka, Wasiirrada, wasiir ku-xigeennada iyo dhammaan hawl-wadeennada sar sare ee dawladdu ma geli karaan ganacsi gaar ah inta ay xilka hayaan.

3. Madaxweynaha, Madaxweyne Ku-Xigeenka, Wasiirrada, wasiir ku-xigeennada iyo hawl-wadeennada sar-sare ee xukuumaddu waa inay Hantidhawrka Guud u caddeeyaan hantidooda bisha ugu horraysa ee ay xafiiska la wareegaan.

4. Dhammaan awaamiirta, wareegtooyinka, iyo sharci-hoosaadyada ay xukuumaddu soo saarto waa inay saxiixaan Madaxweynaha ama wasiirka hawshiisa ay la xariirto.

5. Dhammaan go'aannada Golaha Wasiirradu ku gaaraan aqlabiyad waa mas'uuliyad wadareed.

6. Golaha Xukuumaddu waa inuu xilwareejin u sii diyaariyaa golaha ku xiga laba bilood ka hor dhammaadka muddada xil-hayntiisa.

## Qodobka 77aad
## SHURUUDAHA DOORASHADA MADAXWEYNAHA IYO MADAXWEYNE KU XIGEENKA

1. Muwaadin kasta oo reer puntland ah waa u furuntahay inuu u tartamo mansabka Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku- Xigeenka haddii uu buuxiyo shurrudaha xilka.

2. Shuruudaha laga rabo qofka loo dooranayo Madaxweyne ama madaxweyne ku Xigeen waa:

(a) Waa inuu yahay muwaaddin reer Puntland, muslim ah ku dhaqma diinta Islaamka, miyirkiisu dhanyahay, da'diisuna aanay ka yarayn afartan (40) sano, isla wakhtigaasna aanu qabin xaas ajnebi ah inta uu xilka hayana guursan karin.

(b) Waa inuu leeyahay tacliin sare, waaya-aragnimo hoggaamineed, iyo aqoon la xariirta dhaqanka iyo hiddaha Soomaaliyeed.

(c) Waa inaan xuquuqdiisa muwaadinnimo go'aan maxkmadeed lagu hakin shantii sano oo ugu dambaysay.

(d) Waa inuusan horay u gelin khiyaamo qaran ama ku xadgudbin xuquuqda bani-aadamka.

3. Musharaxa jagada Madaxweynaha ama Madaxweyne ku-xigeenka waxay ka imaan karaan golaha wakiillada iyo dadweynahaba. Haddii xubin ka mid ah Golaha Wakiillada loo doorto Madaxweyne ama Madaxweyne ku Xigeen wuxuu bannaynaya xubinnimadii golaha wakiillada, waxaana beddeleya qofkii xubin sugaha u ahaa.

## Qodobka 78aad
## MUDDADA XILKA

Muddada xil haynta Madaxweynaha iyo Madaxweye Ku-Xigeenku waa shan sano (5) labo jeer oo kaliya ayaana la soo dooran karaa.

## Qodobka 79aad
## AWOODAHA IYO XILALKA MADAXWEYNAHA

1. Waa mas'uulka ugu sarreeya dalka iyo madaxa qaybta fulinta ee dawladda wuxuuna matalaa midnimada shacabka Puntland.

2. Wuxuu u xilsaaran yahay ilaalinta diinta Islaamka, dastuurka, iyo sharciyada dalka.

3. Waa taliyaha Guud ee ciidammada.

4. Madaxweynuhu, isaga oo la tashanaya Madaxweyne Ku-Xigeenka waa inuu Golaha Xukuumadda ku dhisaa 21 beri gudahood oo ka bilawda marka Golaha Wakiilladu xilka u doorto.

5. Wuxuu awood u leeyahay isaga oo la tashanaya Madaxweyne Ku-Xigeenka xil ka qaadista xubnaha Golaha Wasiirrada, madaxda hay'adaha madaxa bannaan iyo madaxda kale ee dastuurku awoodda u siinayo xil ka qaadiddooda.

6. Wuxuu curiyaa oggolaadaana, si waafaqsan dastuurka iyo sharciyada dalka, siyaasadda xukuumaddiisu fulinayso ee la xariirta waaxyaha maamulka guud fulinteedana ku kormeeraa.

7. Wuxuu galaa wada-xaajoodyada la xariira qaabka Dawladda Puntland kaga mid-noqonayso dawladda Federaalka ee Soomaaliya wuxuuna saxiixaa heshiisyada lala gaaro Dawladda Federaalka ah ee Soomaliyeed. Heshiis kasta oo la xariira arrimaha federaalka wuxuu meel-mar ku noqonayaa ansixinta Golaha Wakiillada Puntland.

8. Wuxuu u xilsaarnyahay ka-xaajoodka, hagidda iyo horumarinta xiriirrada caalamiga ah ee Puntland. wuxuuna saxiixaa heshiisyada caalamiga ah.

9. Wuxuu qaabilaa wufuudda ajnebiga ah una aqoonsadaa marti dawladeed.

10. Wuxuu billado iyo shahaado sharaf guddoonsiiyaa muwaaddiniinta Puntland iyo kuwa ajnebiga ah ee mutaysta.

11. Wuxuu leyahay fidinta saamaxaadda iyo cafiska dembiyada siyaasadda iyo kuwa denbiyada ahba marka uu helo soo jeedinta hay'adaha garsoorka, marka laga reebo qisaasta iyo xuduudda shareecada Islaamku jideysay.

12. Wuxuu leeyahay furitaanka kal-fadhiyada Golaha wakiillada.

13. Wuxuu leeyahay ku dhawaaqidda iyo soo saaridda wareegto Xaalad Deg-deg ah si looga hortago dhibaatooyinka ka dhasha:
    (a) masiibooyin dabiici ah,
    (b) Markii Puntland dibedda laga soo weeraro.
    (c) fawdo iyo kacdoon ka aloosma gudaha oo looga gol leeyahay burburinta jiritaanka Puntland.

    Madaxweynaha waxaa waajib ku ah inuu wareegtadaas 30 beri gudahood ku horgeeyo golaha wakiillada si loo ansixiyo.

14. Wuxuu saxiixaa amarna ku bixiyaa in faafinta rasmiga ah lagu soo saaro sharciyada Golaha wakiilladu ansixiyo, ama uu ku horjoogsado diidmo qayaxan hadii madaxweynuhu u arko sharcigaasi inuu dastuurka ka soo horjeedo ama aanu danta dadweynaha ka tarjumeyn.

15. wuxuu si rasmi ah ugu dhawaaqaa taariikhda Hay'adda Doorashadu u astayso qabashada doorashada.

16. wuxuu soo saaraa sharci-hoosaadyo loo adeegsanayo hab-raaca dhaqangelinta sharciyada Golaha Wakiilladu soo saaro. Ma jiri karo sharci-hoosaad ka soo horjeeda sharci Golaha Wakiilladu meel-mariyay.

17. Dhammaan awoodaha iyo xilalka ay faraan sharciyada Puntland.

## Qodobka 80aad

## AWOODAHA IYO XILALKA MADAXWEYNE KU-XIGEENKA

1. Madaxweyne ku-xigeenku wuxuu wadayaa dhammaan xilalka Madaxweyanaha marka uu dalka ka maqan yahay, ama uusan si ku meelgaar ah xilka u gudan karin.

2. Wuxuu kala-taliyaa Madaxweynaha xulashada wasiirada, wasiir ku-xigeennada iyo hawl-wadeennada sar sare iyo shaqo-ka-fariisintooda.

3. Fulinta hawlaha Madaxweynahu u wakiisho oo aan ka baxsanayn xilalka iyo waajibaadka Madaxweynaha.

4. Haddii uu Madaxweynuhu geeriyoodo ama ay la soo gudbaanaato xaalad xil gudasho la'aan oo joogta ah, xilka laga qaado ama uu iscasilo, waxa xilkiisu ku wareegayaa Madaxweyne Ku-xigeenka muddada inta ka hartay.

5. Haddii xaaladda ku xusan Qodobkan Faqradiisa 4aad dhacdo, Golaha Wakiilladu waxa uu soo dooranayaa Madaxweyne ku-xigeen 30 maalmood gudahood.

## Qodobka 81aad

## EEDAYNTA MADAXWEYNAHA IYO MADAXWEYNE KU-XIGEENKA.

Haddii lagu eedeeyo Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka ku-xadgudub dastuur, khiyaamo qaran, iyo fal-dembiyeed culus, waxaa la marayaa habraaca soo socda:

(a) Ugu yaraan afar melood meel (1/4) xubnaha golaha wakiillada ama Xeer Ilaaliyaha guud waa inay codsadaan in la eedeeyo si xilka looga qaado Madaxweynaha ama Madaxweyne ku-xigeenka iyagoo codsigooda ku muujinya sababaha ay u cuskanayaan in xilka laga qaado.

(b) Golaha Wakiilladu wuxuu ka baaraandegaya eedynta la soo hordhigay waxaana mas'uulka lasoo eedeeyey la siinayaa fursad isdifaac.

(c) Markay ku caddaato eedeymaha ku xusan qodobkan mid ama dhammaantood, Golaha Wakiilladu wuxuu oggolaanaya in Xilka laga qaado madaxweynaha ama madaxweyne ku-xigeenka haddi saddex meelood oo labo (2/3) ay codbixin qarsoodi ah ku meel mariyaan.

## Qodobka 82aad

## XILALKA WASIIRKA

1. Wasiirku waa mas'uulka ugu sarreeya wasaaradda loo magacaabay.

2. Wuxuu fuliyaa siyasadda xukuumadda ee la xariirta wasaradda uu wasiirka u yahay.

3. Isaga oo la tashanaya Wasiir ku xigeenka wuxuu go'aamiyaa nidaamka hawl-fulinta wasaaradda iyo shaqaalaheeda.

## Qodobka 83aad
## XILALKA WASIIR KU-XIGEENKA

1. Wasiir ku-xigeenku waxa uu qabanayaa dhammaan xilalka wasiirka marka uu maqan yahay ama uusan si ku-meelgaar ah xilka u gudan karin.

2. Waxa uu kala taliyaa wasiirka dhammaan hawlaha wasaaradda.

3. Fulinta hawlaha wasiirku u wakiisho oo aan ka baxsanayn xilalka iyo waajibaadka wasiirka.

## Qodobka 84aad
## BANGIGA DHEXE

1. Bangiga dhexe waa hay'ad dawladeed oo madax-bannaan wuxuuna u xilsaaranyahay:
   (a) Hirgelinta siyaasadda lacagta ee xukuumadda,
   (b) isaga oo keliya ayaa lacag soo saari kara.
   (c) oggolanshaha shirkadaha maaliyadeed ee gaarka loo leeyahay,
   (d) kormeeridda shirkadaha gaarka ah iyo kuwa guud ee maaliyadda ee Puntland ka hawlgala, Oggolaanshaha iyo kormeeridda bangiga dhexe wuxuu u xilsaarnaanayaa tan iyo inta laga samaynayo hay'ad dawladeed oo u gaar ah mas'uuliyadahaas.

2. Bangiga dhexe waxaa hawlihiisa hagaya guddi sare oo ka kooban toddoba xubnood oo kala ah:
   (a) Guddoomiyaha bangiga dhexe.
   (b) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda.
   (c) Agaasimaha guud ee Wasaaradda ganacsiga.
   (d) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda shaqada iyo Shaqaalaha.
   (e) Saddex xubnood oo ka tirsan maamulka sare ee rugta ganacsiga, iyo
   (f) Xoghayn aan cod lahayn oo noqonaya agaasimaha guud ee bangiga dhexe.

3. Guddoomiyaha Bangiga Dhexe waxaa magacaaba Golaha xukuumadda, waxaana magacaabistiisa iyo casilaaddiisaba ansixiya Golaha wakiillada.

4. Qaab-dhismeedka iyo nidaamka uu ku hawl galo Bangiga Dhexe waxaa qeexaya sharci u gaar ah oo Golaha Wakiilladu ansixiyo.

## Qodobka 85aad

## WAKAALADAHA MADAXABANNAAN

1. Madaxweynuhu isaga oo la tashanaya Madaxweyne ku-xigeenka waxa uu abuuri karaa wakaalado gaar ah oo loo xilsaaro hawlo cayiman.

2. Wakaaladaha madaxa bannaan waxaa la abuuri karaa oo keliya marka uu ka horreeyo sharci u gaar ah oo loo cuskanayo maarayntooda oo uu meel-mariyay Golaha wakiilladu.

## Qodobka 86aad

## THE SECURITY FORCES

Ciidamada nabadgelyada Puntland waxa ay ka kooban yihiin:

(a) Booliis.

(b) Asluub.

# Qaybta 4aad

# GARSOORKA

## Qodobka 87aad

## QAAB DHISMEEDKA IYO MABAADI'DA GARSOORKA

1. Qaybta Garsoorka ee Dawladda Puntland waxay ka koobantahay:

   (a) Maxkamadda Sare.

   (b) Maxkamadda Dastuuriga.

   (c) Maxkamadda Rafcaanka.

   (d) Maxkamadda Darajada Koowaad.

   (e) Guddiga sare ee Maamulka Garsoorka.

2. Qaybta garsoorka oo keliya ayaa awood u leh rididda iyo amridda fulinta xukun la xariira arrimaha dastuuriga, madaniga, dembiyada, maamulka, shaqada iyo arrin kasta oo sharci.

3. Qaybta Garsoorku si buuxda ayey uga madaxbannaan tahay qaybaha xer-dejinta iyo fulinta, waxayna u hoggaansantaa dastuurka iyo sharuucda dalka. Cidina kuma faragelin karto garsooryaasha hawlahooda garsooridda.

4. Qaab dhismeedka, furuucda, kala xadaynta awoodaha iyo hawlaha garsoorka waxaa qeexaya sharci u gaar ah oo uu meel-mariyo Golaha Wakiillada oo ay soo bandhigto Maxkamadda Sare.

5. Maxakamadaha ciidammadu waxay ka garniqi karaan dembiyada ciidammada si waafaqsan sharciga.

6. Garsoorayaashu ma geli karaan hawlo liddi ku ah garsooranimadooda.

7. Qaadista dacwaduhu waa u furan tahay dadweynuhu inay dhegeystaan, hase ahaatee iyada oo la tixgelinayo dhinaca anshaxa, badbaadada carruurta iyo markhaatiyada iyo xasilloonida guud, garsooruhu wuxuu go’aamin karaa inay albaabadu u xiranyihiin.

8. Xukun dacwadeed lama ridi karo iyada oo aan dhincyada is haya oo dhammi fursad u helin inay gartooda jeedsadaan, haddii aan sharcigu si gaar ah u tilmaamin.

9. Qofna ma burin karo, wax kama beddeli karo, kamana baaqsan karo inuu u hoggaansamo go’aan maxkamadeed, haddii maxkamad ka daraja sarraysa aanay wax ka beddelin ama burin.

10. Maxkamaddu waa inay eedaysanaha u macnayso ciqaabta dembiga ku oogan.

## Qodobka 88aad
## MAXKAMADDA SARE

1. Maxkamadda Sare ee Garsoorku waxay ku shaqaysaa go’aan wadareed, waxayna ka koobantahay shan (5) xubnood oo kala ah: Guddoomiye, Guddoomiye Ku Xigeen, iyo saddex (3) garsoore.

2. Maxkamadda Sare waxay yeelanaysaa laba (2) garsoore oo kayd ah oo Guddoomiyaha Maxkamddu ugu yeeri karo qaabka qori tuurka hadba kii loo baahdo, marka garsoorayaasha qaarkood fasax galaan ama garsoore si gaar ah uga cudurdaarto inuu wax ka galo qaadista dacwadaha qaarkood. Garsoorayaasha kaydka ahi waa inay buuxiyaan isla shuruudaha Garsoorayaasha rasmiga ah.

3. Garsoorayaasha maxkamadda sare ee rasmiga ah iyo kuwa kaydka ahba waxaa soo sharaxaya golaha xukuumadda, iyadoo jaga kasta oo ka mid ah garsoorayaasha loo soo sharaxayo laba (2) murashax oo Golaha Wakiilladu kala dooranayo. Haddii tartamayaasha midkoodna waayo aqlabiyadda Golaha Wakiillada wuxuu dib ugu celinayaa Golaha fulinta wuxuuna ka codsanayaa inuu murashixiin kale u soo gudbiyo.

4. Muddada xilhaynta xubnaha Maxmaadda Sare ee rasmiga ah iyo kuwa kaydka ahba waa siddeed sano, dibna waa loo dooran karaa waxaase affar sano kasta la la dooranayaa qayb ka mid. Doorashada u horraysa Golaha Wakiilladu sadddex garsoore oo rasmi ah iyo mid kayd ah wuxuu dooranayaa muddo siddeed (8), laba garsoore oo rasmi ah iyo mid kayd ahna wuxuu dooranayaa affar (4) sano.

5. Xarunta Maxkamadda Sare waa xarunta dawlad Goboleedka Puntland, hase ahaatee dacwadaha way ku qaadi kartaa meel kasta oo dalka ka mid ah.

6. Golaha Wakiillada ayaa aqlabiyad kala bar iyo hal (2/3) tirada guud ee xubnaha golaha xilka kaga qaadi kara garsoorayaasha Maxkamadda Sare sababo sharciga ku cad awgood.

## Qodobka 89aad

## SHURUUDAHA XUBINNIMADA MAXKAMADDA SARE

Qofka noqonaya garsoore maxkamadda sare waa inuu buuxiyo shuruudaha soo socda:

(a) waa inuu yahay muwaaddin Puntland ah, xuquuqdiisana la hakin shantii(5) sano ee la soo dhaafay.

(b) Waa inaan da'diisu ka yarayn Afartan sano (40).

(c) Waa inuu haysto shahaado culuunta sharciga oo uu ka qaatay Jamacaad la aqoonsanyahay.

(d) Waa inuu leeyahay waaya aragnimo garsoor oo aan ka yarayn lix sano (6) ama qareennimo toban(10) sano ah.

(e) Waa inuu yahay qof lagu yaqaan hufnaan iyo daacadnimo.

## Qodobka 90aad

## GO'AAN QAADASHADA MAXKAMADDA SARE

1. Go'annada Maxkamadda sare waxay ku ansaxaan aqlabiyadda xubnaha maxkamadda.Garsoore kasta wuxuu xor u yahay inuu caddaysto cod diidmo ah.

2. Xoghayaha Maxkamadda Sare waa inuu la socodsiiyaa go'aannada maxkamadda dhinacyada ay khuseyso.

## Qodobka 91aad

## AWOODAHA IYO XILALKA MAXKAMADDA SARE

1. Maxkamadda Sare waa darajada ugu sarraysa maxkamadaha, waxayna leedahay awood ku baahsan Puntland oo dhan.

2. Waxay Golaha Wakiillada u soo jeedisaa samaynta maxkamado cusub.

3. Inay horgeyso golaha wakiillada mashruuc sharci ama wax kabeddelid sharci oo la xariira Garsoorka.

4. Inay xalliso khilaafyada ka dhasha is qabadyada maxkamadaha kala geddisan ee la xariira awoodahooda.

5. Go'aan ka gaarista ugu dambaysa garta uga timaadda maxkamadaha hoose ka dib marka ay ku qanci waayaan dhinacyada is haya mid ama qaar ka mid ah.

6. Xallinta khilaafyada sharci ee ay xal ka gaari waayaan maxkamadda iyo masu'uliyiinta kale ee ay khusayso.

7. Diyaarinta habraacyada dacwadaha ka dhacaya dalka dibaddiisa, iyo inay oggolaato habraaca lagu fulinayo dacwad ama Xarig denbiile dal kale lagaga soo xukumay.

8. Go'aan ka gaarista dhammaan codsiyada isu-gacan gelinta dembiilayaasha.

9. Kormeeridda maxkamadaha darajada hoose iyo qaadista tallaabooyin lagu sugayo in go'aannadoodu yihiin kuwa sugan oo xaqsorid ku salaysan.

10. Xakumidda hawlwadeennada sharcigu u jideeyo xakumiddodda.

11. Gudashada dhammaan xilalka iyo awoodaha sharcigu siiyo.

## Qodobka 92aad
## MAXKAMADAHA RAFCAANKA

1. Fadhiyada maxkamadaha rafcaanku waa magaalo-madaxyada gobollada.

2. Maxkamadaha rafcaanku waxa ay qaadaan dacwadaha rafcaanka laga soo qaatay ee xukunnadoodu ka soo dhamaadeen maxkamadaha derejada kowaad.

3. Awoodda maxkamadda  rafcaanku waxa ay ku egtahay gobalkeeda.

4. Tirada garsoorayaasha maxkamadda rafcaanku ugu yaraan waa saddex.

5. Shuruudaha garsoorayaasha loo qaadanayo maxkamadda rafcaanka waxaa loo cuskanayaa shuruudaha ku xusan qodobka 89aad ee dastuurka.

## Qodobka 93aad
## MAXKAMADDA DEREJADA KOOWAAD

1. Maxkamadaha derejada koowaad ee degmooyinku waa maxkamadaha ay ka bilawdaan dacwaduhu nooc kasta ha ahaadeene, marka laga reebo dacwadaha sharcigu u jideeyay maxkamada darajooyinka sare ee garsoorka.

2. Tirada garsoorayaasha maxkamadaha derejada koowaad waxaa go'aaminya sharciga.

3. Sharciga lagu maamulo xirfadaha garsoorennimada ayaa lagu qeexayaa shuruudaha laga rabo garsooraha maxkamadda derejada kowaad.

## Qodobka 94aad
## MAXKAMADDA DASTUURIGA AH

1. Maxkamadda dastuuriga ahi waxay dhismaysaa, marka maxkamadda sare xubneheeda lagu kordhiyo afar(4) garsoore oo bulshada laga soo xulay.

2. Afarta garsoore ee bulshada laga soo xulayo waxaa la magacaabayaa soddon beri(30) ka dib marka xubnaha maxkamadda sare la magacaabo.

3. Afarta garsoore ee bulshada laga soo xulayo, labo ka mid ah waxaa dooranaya Golaha Wakiillada labada kalena waxaa soo xulaya Golaha Xukuumadda waxaana ansixinaya Golaha Wakiillada.

4. Afarta xubnood ee maxkamada dastuuriga ah ee laga soo xulay bulshadda waxay dhammaan xuquuqda kala mid noqonayaan garsoorayaasha maxkamada sare.

5. Gudoomiyaha maxkamadda sare ayaa noqonaya guddoomiyaha maxkamadda dastuuriga ah.

6. Maxkamaddu waxa ay u hoggaansamaysaa sharciga oo keli ah maammul ahaan iyo garsoor ahaanba.

7. Xoghayaha maxkamadda dastuuriga ah waxa noqonayaa xoghayaha maxkamadda sare.

8. Haddii xubin ama ka badan lumiso xubinnimadeeda waxaa lagu soo magacaabayaa badelkeedii (45) afartan iyo shan beri gudohood.

9. Xarunta maxkamadda dastuuriga ahi waa caasumadda puntland.

10. Sharci gaar ah ayaa nidaaminaya qaabka dhismaha iyo habka shaqada maxkamadda dastuuriga ah.

## Qodobka 95aad

## AWOODAHA IYO XILALKA MAXKAMADDA DASTUURIGA AH

1. Maxkamadda Dastuuriga ahi waxay awood u leedahay inay buriso sharci, xeer hoosaad ama wareegto golaha fulinta gebi ahaanteed ama qaybo ka mid ah sababo la xariira inuu dastuurka ka soo horjeedo awgeed.

2. Go’aan ka gaarista cabasho muwaaddin oo la xariirta tacaddi loo geystey xuquuqdiisa muwaaddinnimo.

3. Is-waafajinta shareecada Islaamka iyo Dastuurka.

4. Go’aan ka gaarista is-qabasho qaybaha dawladda ee la xariira awoodaha iyo xilalka dastuurku u kala asteeyo.

5. In ay talo sharci ka siiso golaha wakiillada marka uu ka codsado.

## Qodobka 96aad

## GO’AAN QAADASHADA MAXKAMADDA DASTUURIGA AH

1. Maxkamadda dastuuriga ah waxay go’aannadeedu ku ansaxaan cod hal-dheeri ah.

2. Go’aannada maxkamadda dastuuriga ah waa in la diiwaan galiyo, dadweynaha lala socodsiiyo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee dawladda.

3. Xoghayaha maxkamaddu waa inuu go’aannada maxkamadda ogeysiiyaa dhinacyada ay khusayso.

## Qodobka 97aad

## SHURUUDAHA XULIDDA GARSOORAYAASHA MAXKAMADDA DASTUURIGA

Garsoorayaasha maxkamadda dastuuriga ah ee aan ka tirsanayn maxkamadda sare waa inay buuxiyaan shuruudaha ku xusan qodobka 89aad ee dastuurka.

## Qodobka 98aad

## LUMINTA XUBINNIMADA MAXKAMADDA DASTUURIGA AH

Luminta xubinimada maxkamadda Dastuuriga ah waxaa loo cuskanayaa qodob 60.1ee dastuurka.

## Qodobka 99aad

## GUDDIGA SARE EE MAAMULKA GARSOORKA

1. Guddiga sare ee garsoorka ayaa leh masu'uuliyadda maamulka qaybta garsoorka ee dawladda.

2. Guddiga sare ee maamulka Garsoorku wuxuu ka kooban yahay:
   (a) Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ayaa noqonaya guddoomiyaha Guddiga sare ee maamulka Garsoorka.
   (b) Laba (2) garsoore oo ka tirsan Maxkamada sare.
   (c) Laba garyaqaan oo laga soo xulay dadweynaha oo ay soo xusho xukumaddu Golaha wakiilladuna oggolaado.

3. Guddiga sare ee maamulka garsoorka waxaa hawlihiisa haga sharci u gaar ah oo xukuumadu soo bandhigto Golaha Wakiilladuna meelmariyo.

## Qodobka 100aad

## AWOODAHA IYO XILALKA GUDDIGA SARE EE MAAMULKA GARSOORKA

Awoodaha iyo xilalka Guddiga sare ee maamulka garsoorku waa:

1. Magacaabidda, ruqsaynta, beddelaadda, dallacsiinta, anshax- marinta Garsoorayaasha maxkamadaha racfaanka, kuwa darajada koowaad, iyo shaqalaha kale ee qaybta garsoorka.

2. Diyaarinta halbeegyada sharci ee la xariira taxanaha shaqo ee dhinaca maamulka ee hawlawadeennada garsoorka, iyo u gudbinta halbeegyadaas maxkamadda sare si ay u horgeyso golaha wakiillada.

3. Samaynta xarun u gaar ah tababarrada garsoorka si loo horumariyo heerarka aqoonta iyo farsamadda garsoorennimo ee garsoorayaasha.

4. Shuruudaha uu u adeegsanayo Guddiga sare ee maamulka Garsoorku shaqaalaynta garsoorayaasha iyo shaqaalaha kale ee garsoorka waxaa lagu faa-faahinayaa sharciga garsoorka.

## Qodobka 101aad

## QADDARINTA IYO ADEEGSIGA XEER DHAQMEEDKA

1. Dastuurku wuxuu aqoonsanyahay xeer dhaqmeedka aan ka hor imaanayn Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka.

2. Isimmadu waa heerka ugu sarreeya hoggaamiye dhaqameedka.

3. Si loo ilaaliyo sharafta iyo dhex-dhexaadnimada hogaamiye dhaqameedyada, waxaa reeban in ay ka qayb qaataan ururo iyo xisbiyo siyaasadeed.

4. Wixii muran iyo ismaandhaaf ah oo ka dhex dhaca beelaha ee xal looga waayo dastuurka iyo qawaaniinta kale, waxa loola noqonayaa xeer dhaqameedka bulshada si hogaamiye dhaqmeedyadu talo uga soo jeediyaan ama go’aan uga gaaraan.

5. Go’aannada dibu-heshiisiinta, dhex-dhexaadinta, iyo heshiisyada xallinta khilaafaadka ay guddoomiyaan hoggaamiye dhaqameedyadu, iyaga oo adeegsanaya xeerarka hab-dhaqameedka, madaxda hay’adaha maamulka oo dhammi waa inay aqoonsadaan gacanna ku siiyaan hoggaamiye dhaqameedyada fulintooda.

6. Marka hoggamiye dhaqameedyadu gaaraan go’aan ku saabsan xallinta khilaafaadka beelaha dhexdooda, waa in laga diiwaan geliyaa maxkamadda drajada koowaad ee degmada dhibaatadu ka dhacady. Maxkamadduna waa inay la socataa fulinta go’aankaas.

# Qaybta 5aad

## HAY’ADAHA KALE EE ASAASIGA AH EE DAWLADDA

# Xubinta Koowaad

# XAFIISKA XEER ILAALIYAHA GUUD

## Qodobka 102aad

## XEER ILAALINTA GUUD

1. Xeer Ilaalinta Guud waxay ka kooban tahay:
   (a) Xeer Ilaaliyaha Guud.
   (b) Laba ku xigeen oo kala qaabilsan oogista dacwadaha iyo difaaca dadweynaha.
   (c) Xeer Ilaaliyayaasha Gobollada.

2. Qaab-dhismeedka, jahaynta hawlaha Xafiiska xeer Ilaaliyaha Guud, iyo magacaabidda xeer ilaalin gaar ah marka loo baahdo sharci gaar ah ayaa qeexaya.

3. Xarunta Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud waa Caasimadda Puntland.

4. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu leeyahay sharciyad ku baahsan Puntland oo dhan.

## Qodobka 103aad

## MAGACAABIDDA XEER ILALAIYAHA GUUD

1. Galaha Fulinta ayaa magacaabaya Xeer Ilaaliyaha guud waxayna horgeynayaan Golaha Wakiillada si uu u ansixiyo.

2. Qofka loo magacaabayo Xeer Ilaaliye Guud waa inuu buuxiyo shurrudaha soo socda:
    (a) inuu yahay muwaaddin Puntland.
    (b) inaan da’diisu ka yarayn 40 sano.
    (c) inuu haysto shahaado Jaamacadeed ee culuunta sharciga, isla markaasna uu leeyahay waaya aragnimo garsoore ama qareen oo aan ka yaryan toban (10)sano.
    (d) Waa inuu leeyahay dhaqan wanagsan iyo karti xil gudasho oo hawshiisa la xiriirta.

3. Shuruudo la mid ah kuwa lagu xusho Xeer Ilaaliyaha Guud ayaa looga baahanyahay labada ku xigeen, marka laga reebo da’dooda oo aan ka yarayn shan iyo soddon (35)sano, iyo muddada waaya aragnimadooda oo aan ka yarayn shan (5)sano.

4. Muddada xil-haynta Xeer Ilaaliyaha Guud waa shan sano oo la cusboonayn karo.

## Qodobka 104aad

## AWOODAHA IYO XILALKA XEER ILAALIYAHA GUUD

1. Isku dabbarididda habraaca sharci iyo dacwad ku oogista hawl-wadeenada xukuumadda, si dastuurka waafaqsan.

2. Difaacidda danaha dawladda iyo bulshada Puntland.

3. Hagidda baarista fal-dembiyeedyada, isku-dubbarididda eedeynta iyo oogista dacwadaha maxkamadda horteeda, mar kasta oo uu u arko in ay lagama marmaan tahay. Marka lagu guda jiro dembi barista boolisku waxay raacayaan awaamiirta Xeer Ilaaliyaha Guud.

4. Difaacidda danaha dhaqaale ee dawladda.

5. Matalaadda dawladda mar kasta oo ay taagantahay dacwad maxkamadeed oo ay xukuumaddu dhinac ka tahay, iyo marka dawladda ay gelayso heshiisyo qandaraas oo dawladdu kula wareegeyso ama ku wareejinayso hanti ma-guurto ah.

6. Magacaabidda guddiyo gaar ah oo gacan ku siiya xil gudashadiisa.

7. Kormeeridda duruufaha xabsiyadda iyo xarumaha dhaqan celinta.

8. Inuu u qareemo marka eedaysanuhu aanu kari Karin inuu qareen qabsado.

9. Ilaalinta iyo dhawrista xaqa qoyska, agoomaha, carruurta, garaad-dhimanka iyo cid kasta oo u baahan inay sharciga gabbadsato.

10. Magacaabista, hagidda iyo xil ka qaadista shaqaalaha Xafiiska Xeer Ilaalinta.

11. Adeegsashada dhammaan awoodaha iyo gudashada xilalka sharcigu faro.

### Qodobka 105aad

### XIL KA QAADISTA XEER ILAALIYAHA GUUD

Xeer Ilaaliyaha Guud waxaa xilka lagaga qadi karaa oo keliya sababo sharciga ku cad oo ay soo jeediyaan Golaha Xukuumaddu aqlabiyadda Golaha wakiilladuna oggollado.

## Xubinta Labaad
## DIFAACA XUQUUQDA AADANAHA

### Qodobka 106aad

### XAFIISKA DIFAACA IYO TAABBAGELINTA XUQUUQDA AADANAHA

1. Xafiiska Difaaca iyo Taabbagelinta xuquuqda aadanuhu wuxuu ka koobanyhaay:
   (a) Difaacaha Xuquuqda Aadanaha.
   (b) Wakiillada gobollada ee Xafiiska Difaacaha Xuquuda Adanaha.
   (c) Hawl-wadeennada Xafiiska Diffaca Xuquuqda Aadanaha.

2. Xarunta Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanahu waa caasimadda Puntland.

3. Difaacaha Xuquuqda Adanuhu wuxuu leeyahay awood xil-gudasho oo heer Puntland ah.

## Qodobka 107aad
## MAGACAABIDDA DIFAACAHA

1. Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Golaha Wakiillada ayaa Golaha u bandhigaya xubnaha u tartamaya mansabka Difacaha Xuquuqda Aadanaha, goluhuna wuxuu ku kala dooranayaa codbixin saddex meelood labo (2/3).

2. Qofka loo dooranayo Difaacaha Xuquuqda Aadanaha waa inuu buuxiyo shurrudaha soo socda:
   (a) Waa inuu yahay muslim, muwaaddin reer Puntland ah.
   (b) waa inaan da'diisu ka yarayn afartan (40) sano.
   (c) waa inuu leeyahay aqoon iyo waaya aragnimo la xariirta xuquuqda aadanaha.
   (d) Waa inuu leeyahay dhaqan wanagsan iyo karti xil gudasho oo xilkiisa la xiriirta.

3. Muddada xil-haynta Difaacaha Xuquuqda Aadanahu waa shan sano dibna waa loo dooran karaa.

## Qodobka 108aad
## AWOODAHA IYO XILALKA DIFAACAHA XUQUUQDA AADANAHA

Awoodaha iyo xilalka Difaacaha Dadweynaha waa:

1. Ka hortegidda xadguudbyada Xuquuqda Aadanaha, isagoo tala bixin siinaya hay'adaha ku shaqada leh.

2. Taabbagelinta wacyiga iyo qaddarinta dadweynaha iyo mas'uuliyiinta dawladda ee la xariirta Xuquuqda Aadanaha ee ku cad Dastuurka iyo sharciyada Puntland, isla markaasna ku xusan Axdiyada iyo heshiisyada caalamiga ah.

3. Markasta oo mas'uuliyiinta dawladu ku xadgudbaan Xuquuqda Aadanaha waxaa tiir-dhexaad u ah oo loo cuskanayaa dastuurka iyo sharciyada Puntland,

4. ka baarandegidda cabashooyinka ay soo bandhigaan dadweynaha iyo ururrada bulshada oo la xariira xadgudubyo ka dhan ah xaquuqda aadanaha natiijooyinka baaritaannadaas kasoo baxana u bandhigo masu'uuliyiinta ay khusayso iyo dadweynahaba. Isla markaana uu raaciyo talooyin wax ka taraya dhawridda xuquuqda Aadanaha ee Puntland.

5. Inuu taageero dadka lagu sameeyo xadgudubyo Xuquuqda Aadanaha ka dhanka ah uu maxkamadda horteeda ka difaaco.

6. Magacaabidda guddiyo gaar ah oo gacan ka siiya gudashada xilkiisa.

7. Joogtaynta kormeeridda goob kasta oo lagu falo ama la tuhunsanyahay in lagu gabood-fallo Xuquuda Aadanaha

8. U ololaynta hagaajinta sharciyada iyo hab-dhaqanka maamulka si kor loogu qaado dhawrista iyo qaddarinta Xuquuqda Aadanaha.

9. U bandhigidda kalfadhiyada Golaha Wakiillada warbixin sannadeed la xariirta xaaladda Xuquuqda Aadanaha ee Puntland, isaga oo isla warbixintaas u baahinaya dadweynaha.

10. U bandhigidda Golaha Wakiillada talooyinka ku aaddan mashruuc sharci oo kasta oo khuseeya Xuquuqda Aadanaha.

11. Adeegsashada dhammaan awoodaha iyo gudashada xilalka kale ee sharciyada Puntland siiyaan xafiiskaas.

## Qodobka 109aad

## XIL KA QAADISTA DIFAACAHA XUQUUQDA AADANAHA

Difaacaha Xuquuqda Aadanaha waxaa xilka ka qaadi kara saadex meelood oo labo (2/3) Golaha Wakiillada marka ay sugnaadaan sababo sharciga ku cad oo keliya.

# Xubinta Saddexaad
# HANTI DHAWRKA GUUD

## Qodobka 110aad

## XAFIISKA HANTI DHAWRKA GUUD

1. Xafiiska Hanti Dhawrka Guud waa hay’ad madaxbannaan wuxuuna u hoggaansamaa sharciga oo keliya.

2. Xaruunta Hanti Dhawrka Guud waa caasimadda Puntland wuxuuna leeyahay awood ku baahsan Puntland oo dhan.

3. Madaxa xafiiska Hantidhawrka Guud Golaha Xukuumadda ayaa magacaaba mudda shan sano (5) ah waxaana xilka lagaga qaadi karaa sababo sharciga ku cad, magacaabidda iyo xil ka qaadistiisuna waxay meel mar ku noqonayaan oggolaanshaha Golaha Wakiillada.

4. Qofka noqonaya Madaxa Xafiiska Hanti Dhawrka Guud waa inuu yahay muwaadin Puntland ah oo aan da’diisu ka yarayn afartan sano (40) isla markaasna aqoon u leh xisaabaadka dawladda iyo guud ahaanba Xisaabaadka, waana inay u weheliso waaya aragnimo la xariirta isla hawshaas oo aan ka yarayn shan (5) sano.

5. Marka laga reebo Madaxa Xafiiska Hanti Dhawrka Guud dhammaan shaqaalaha kale ee xafiiska waxaa lagu qaadanayaa si waafaqsan sharciga shaqaalaha dawladda ee Puntland.

6. Qaab dhismeedka iyo habraacyada Xafiiska Hantidhawrka Guud Sharci gaar ah ayaa qeexaya.

## Qodobka 111aad
## AWOODAHA IYO XILALKA HANTI DHAWRKA GUUD

Awoodaha iyo xilalka Hantidhawraha Guud:

1. La dagaallanka musuqmaasuqa heer kasta oo maamulka dawladda dhexdeeda ka jira.

2. Hubinta in dhammaan kharashyada xisaabaadka dawlada ee ay galaan dhammaan hay'adaha dawladdu ay ku baxaan si sharci ah oo waafaqsan miisaaniyadda dawladda.

3. Dabagalka munaasibnimada waxqabadyada dawladda ee kallifa kharaj bixin ka soo jeedda xisaabaadka dawladda.

4. Baaritaanka hay'adaha dawladda, dawaladaha hoose, wakaaladaha Madaxa bannaan, shirkadaha wadaagga ah ee dawladdu qayb ka tahay iyo meel kasta oo lagu maamulo hanti dawladeed, si waafaqsan habraacyada maaliyadeed iyo xisaabaadka dawladda.

5. go'aan ka gaaridda masu'uul kasta oo si khaldan u maamula maaliyad dawladeed iyo go'aaminta ganaax u dhigma heerka takrifalka masu'uulkaasi galay. Haddii baaritaanka uu ka soo baxo fal-dembiyeed, Hanti dhawrka Guud wuxuu kiiskaas oo ay la socdaan qoraallada ka marag kacaya u gudbinayaa Xeer Ilaalinta Guud si dacwad loogu oogo.

6. Inuu hay'ad walba oo dawladeed weydiisto ama kala wareego dokumentiyada uu u baahanyahay marka uu baaritaan ku samaynayo inay jirto xatooyo ama ku takrifal hanti dadweyne si uu uga baaraandego.

7. Inuu sannad walba u gudbiyo Golaha Wakiillada laba warbixinood oo qoraal ah oo tafatiran labada kal-fadhi:- (a) Warbixinta kowaad oo ku aaddan bilowga kalfadhiga hore waxay ku saabsan tahay dhaqan gelidda misaaniyaddii sannadkii la soo dhaafay. (b) warbxinta labaad oo ku beegan bilawga kal-fadhiga labaad waxay ku saabsan tahay soo bandhigidda xaalladda miisaanaydda socota, ka hor intaa aan xukuumaddu u gudbin Golaha Wakiillada miisaaniyadda sannadka soo socda. Labada warbixinoodba Xafiiska Hanti Dhawrku wuxuu ku darayaa talooyinka ku habboon hagaajinta maaliyadda dawladda.

8. Xafiiska Hanti Dhawrka Guud wuxuu awood u leeyahay soo saaridda sharci hoosaadyo iyo habraacyo ku aaddan gudashada xilalka hanti dhawrka guud.

9. Gudashada awoodaha iyo xilalka kale ee ay faraan sharciyada Puntland.

# Xubinta Afraad
# HAY'ADDA DOORASHADA

## Qodobka 112aad
## GUDDIGA DOORASHADA EE PUNTLAND

1. Guddiga Doorashada Puntland wuxuu u hoggaansamayaa sharciga oo keliya, wuxuuna hawlihiisa u gutaa si ka madaxbannaan qaybaha kale ee dawladda.

2. Waa hay'adda ugu sarraysa arrimaha doorashooyinka, go'aannadiisa doorashooyinka la xariirana kama hor imaan karaan mana burin karaan hay'adaha kale ee dawladdu, marka laga reebo Maxkamadda Dastuuriga ah oo go'annada Guddiga isku hortaagi karta sababo dastuuri ah oo keliya.

3. Guddiga Doorashada Puntland wuxuu ka kooban yahay toddoba (7) xubnood oo la dooranayo muddo lix (6) sano ah.

## Qodobka 113aad
## HABRAACA GUDDIGA DOORASHADA

Golaha wakiillada ayaa ku dooranaya Xubnaha Guddiga Doorashada qaabka soo socda:

(a) Afhayeenka baarlamaanka ayaa bil ka hor wakhtiga loo muddeeyey doorashada Xubnaha Guddiga Doorashada iclaaminaya in Madaxweynaha iyo xisbiyada siyaasaddu u soo gudbiyaan Golaha Wakiillada magacyada xubnaha ay u magacaabayaan inay ka mid noqdaan Guddiga Doorashada.

(b) Saddexda Xisbi mid waliba qof ayuu soo magacaabayaa, Madaxweynuhuna laba xubnood.

(c) Golaha wakiilladu wuxuu hubinaya in xubnaha ay soo kala magacaabeen Madaxweynaha iyo xisbiyada siyaasaddu ay buuxiyeen shuruudaha xubinnimada Guddiga doorashada. Qofkii Goluhu u arko in aanu buuxin shuruudaha dib ayuu ugu celinayaa dhinicii soo gudbiyey, waana in shan iyo toban(15) beri gudohood lagu soo gudbiyo magaca/magacyada murrashaxa/musharraxiinta cusub.

(d) Goluhu aqlabiyad kala bar iyo hal xubnaha Golaha ah ayuu ku dooranayaa xubnaha ay soo kala gudbiyeen Madaxweynaha iyo xisbiyada siyasaddu, labada xubnood oo kalena Golaha wakillada ayaa codbixin toos ah oo saddex meelod labo (2/3) ku dooranaya. Hadii ay dhacdo in murrashax waayo codka aqlabiyadda Goluhu dib ayuu ugu celinayaa dhinicii soo jeediyay waana in shan iyo toban (15) beri gudahood lagu keeno beddelkiisa.

(e) Haddii ay dhacdo in xisbi siyaasi ah ama Madaxweynuhu keeni waayo magacyada shakhsiyaadka ay u sharraxayaan xubinnimada Guddiga

Doorashada wakhtiga kama dambaysta ah ee guddoomiyaha Goluhu u cayimo, isla Golaha ayaa toos u dooranaya xubnaha bannaanaada.

## Qodobka 114aad

## AWOODAHA IYO XILALKA GUDDIGA DOORASHADA

1. Guddiga Doorashada Puntland Wuxuu leeyahay awoodaha iyo xilalka soo socda:
   (a) Fulinta iyo maamulidda doorashooyinka iyo aftida.
   (b) Ka garsooridda doorashooyinka, xallinta khilaafaadka, xukumidda xuquuqda iyo ganaaxidda qof kasta oo ku xadgudba sharciga doorashooyinka.
   (c) Oggalaanshaha xisbiyada siyaasadda, kormeeridda sharcinnimada hawlgalladooda, iyo xaqsooridda is-qabadyada xisbiyada dhexdooda ah, markii qof ama koox xisbi kamid ahi ay codsadaan in guddigu soo farageliyo arrimaha xisbi dhexdiisa ka taagan.
   (d) Dejinta qaababka lagama maarmaanka u ah gudashada xilalka Guddiga Doorashada iyo habraacyada hirgelinta doorashooyinka.

2. Golaha Wakiilladu waa inuu meel-mariyo Sharci gaar ah oo haga dhamman waxqabadka Guddiga Doorashada.

3. Xil ka qaadista xubnaha Guddiga Doorashada waxaa awood u leh Golaha wakiillada marka ay jiraan sababo sharciga ku cad oo keliya.

## Qodobka 115aad

## WADA SHAQAYNTA GUDDIGA DOORASHADA IYO XISBIYADDA SIYAASADDA

1. Dhammaan xisbiyada siyaasadda ee ka qaybgelaya tartanka doorashooyinka waxay xaq u leeyihiin inay kormeeraan dhammaan tallaabooyinka doorashooyinka. Sharciga ayaa qeexaya qaab hay'adeedka xisbiyadu ku adeegsanayaan xaqaa isaga ah.

2. Xisbiyada siyasaddu waxay xaq u leeyihiin inay goob joogayaal ka ahaadaan dhammaan faracyada Guddiga Doorashada ee heer gobol, degmo iyo goobaha cod bixinta. Sidoo kale xisibiyadu waa inay ka qaybgalaan soo xeraynta sanduuqyada codbixinta iyo tirinta codadka. Guddiga Doorashada Puntland waa inuu hubiyo inaan shakhsiyaad isku siyaasad ahi yeelan aqlabiyadda gacan ku haynta maamulidda hawlaha doorashooyinka.

3. sharciga ayaa tilmaamaya isticmaalidda iyo xuduudda tabarrucaadyada gaarka ah ee loo adeegsado ololayaasha xisbiyada iyo murashaxiinta xilliyada doorashooyinka.

4. Dhammaan Xisbiyada siyasadda ee doorashooyinka ka qaybgelaya waa inay fursad siman u leeyihiin warbaahinta dawladda marka lagu jiro ololayaasha doorashooyinka.

5. Guddiga Doorashooyinka Puntland ayaa u xilsaaran hubinta dhaqngelidda wada shaqaynta ku tilmaaman faqradaha qodobakan.

# Qaybta 6aad
# MAMULLADA GOBOLLADA IYO DEMOOYINKA

## Xubinta Koowaad
## MAMULLADA GOBOLLADA

### Qodobka 116aad
### BAAHINTA MAAMULKA GOBOLLADA IYO DEGMOOYINKA

1. Puntland waxay ku dhaqmeysaa mabaadi'da baahinta xukunka.
2. Si loo hirgeliyo baahinta maamulka dawladda, dalku wuxuu u qaybsan yahay gobollo iyo degmooyin.
3. Xukuumadda ayaa u xil saaran dib u habeynta iyo kala xadeynta gobollada iyo degmooyinka.
4. Nidaamka baahinta xukunka waxaa lagu qeexayaa sharci gaar ah oo Golaha Wakiilladu meelmariyo.

### Qodobka 117aad
### AWOODAHA IYO XILALKA GODDOMIYAHA GOBOLKA

1. Gobol walbi wuxuu yeelanayaa Guddoomiye Gobol oo ay xukuumaddu magacawdo.
2. Guddoomiyaha gobolku wuxuu leeyahay awoodaha soo socda:
   (a) Wuxuu guddoomiya shirarka guddiyada horumarinta iyo nabad-gelyada;
   (b) Waxa uu kormeer-hawleed ku leeyahay dhammaan shaqada dawladda ee gobolka;
   (c) Guddoomiyaha gobolka ayaa gudoomiya kulamada ay isugu yimaadaan guddiyada degmooyinka oo lixdii biloodba mar dhaca.
   (d) Waxa uu isku xiraa maammulka dhexe ee Puntland iyo kan gobolka.

### Qodobka 118aad
### SHURUUDAHA LAGA DOONAYO INUU BUUXIYO QOFKA NOQONAYA GUDDOOMIYE GOBOL

Qofka noqonaya Guddoomiye Gobol waa inuu buuxiyo shuruudaha soo socda:

(a) Waa inuu yahay muwaaddin Puntland.
(b) Waa inaan da'diisu ka yarayn shan iyo labaatan (25) sano.

(c) Waa inaan xuquuqdiisa muwaaddinnimo la hakin shantii (5) sano ee la soo dhaafay.

(d) Waa in uu leeyahay Aqoon sare iyo waayo aragnimo maamul.

(e) Waa inuu xog-ogaal u yahay duruufaha iyo dhibaatooyinka ka taagan Gobolka.

# Xubinta Labaad
## MAAMULLADA DEGMOOYINKA

### Qodobka 119aad
### GOLAYAASHA DEGAANKA

1. Gobol waliba maamul ahaan, wuxuu u qaybsamayaa degmooyin. Sharci u gaar ah ayaa goynaya tirada, magacyada, iyo xuduudaha ay kala yeelanayaan degmooyinka isku gobol ka tirsan iyo derejooyinka ay kala yeelanayaan oo ku xirnaanaysaa tirada dadka deggan, dhaqaalaha iyo baaxadda dhulka degmo kasta.

2. Degmo kastaa waxay lahaanaysaa madaxbannaani dhaqaale iyo maamul, waxaana u talinaya gole degaan. Sharciga ayaa dejinaya mabaadi'da guud ee saldhigga u noqonaya hab-maamuleedka degmada, xil-gudashada iyo adeesashada awoodaha ay degmadu u madaxbannaantahay. tirada xubnaha golaha degaanka degma kasta waxay ku xirnaanaysaa tirada dadka ku nool.

3. Golayaasha Degaanka waxaa dooranaya muwaaddiniinta degmooyinka muddo shan (5) ah dibna waa loo dooran karaa.

### Qodobka 120aad
### HABRAACA GOLAHA

1. Xubnaha Golaha Degaanka fadhigooda ugu horreeya waxay ku dooranayaan Guddoomiye iyo Guddoomiye ku-xigeen hoggaamiya fadhiyada golaha.

2. Goluhu wuxuu xubnihiisa ka dhex dooranayaa Duq Magaalo iyo ku xigeen Duq Magaalo.

3. Duqa Magaaladu waa madaxa fulinta dawladda hoose, wuxuuna isku xiraa maamulka degmada iyo kan gobolka.

4. Golaha degaanku wuxuu dooranaya guddiga fulinta ee degmada oo aan ka badnaan Karin saadex meelood meel (1/3) xubnaha golaha degaanka ee degmada kuwaasoo ay ka mid yihiin duqa magaalada iyo ku xigeenkiisu.

5. Golaha fulinta ee degmada oo uu guddoomiyo duqa magaaladu waxay u xilsaaranyihiin fulinta go'aannada Golaha Deegaanka iyo hawl maalmeedka maamulka degmada.

## Qodobka 121aad

## AWOODAHA IYO XILALKA GOLAHA DEEGAANKA

1. Go'aaminta, wax ka beddelidda iyo joojinta khidmadaha laga qaado dadweyunuhu ee la xariira adeegyada uu fuliyo golaha degaanku, iyo goynta tabarrucaadyo gaar ah oo laga rabo dadweynaha laguna maalgeliyo mashaariicda hawlaha guud ee laga fuliyo degaanka.

2. Oggollanshaha iyo u baahinta dadweynaha ku talo galka miisaaniyad sannadeedka degmada oo ah dakhli iyo kharash isu dheelli tiran.

3. Shaqaalaynta, dallacsiinta iyo ruqsaynta shaqaalaha dawladda hoose ee degmada.

4. Dejinta sharci-hoosaadyo iyo awaamiir lagu fulinayo hawlaha iyo adeegyada loo qabanayo dadweynaha degmada.

5. Diyaarinta iyo go'aaminta cashuuraha degmada loona bandhigo Golaha Wakiillada si uu uga doodo una oggolaado.

6. Dejinta qorshaha horumarinta degmada, hirgelintiisana la kaashadaan maamulka dhexe ee Puntland.

7. Maamulidda khayraadka degmada iyo dakhli kasta oo kale ee soo gala gacantooda ayna xisaab celin tifatiran u gudbiyaan Wasaaradda Maaliyadda.

8. Gacan ka geysashada fulinta mashaariicda horumarinta ee ka mid qorshayaasha hay'adaha dawladda ee heer qaran, Puntland iyo gobol.

9. Adeegsashada awoodaha iyo gudashada xilalka ay siiyaan dastuurka iyo sharciyada Puntland.

## Qodobka 122aad

## SHURRUDAHA DOORASAHADA XUBNAHA GOLAHA DEGAANKA

1. Muwaaddin kasta oo muslim ah, xilkas ah, garaadkiisu dhanyahay, muwaaddin Puntland ah, da'diisuna aanay ka yarayn shan iyo labaatan (25) sano waa loo dooran karaa inuu xubin ka noqdo golayaasha degaanka ee Puntland.

2. Waa inaan la hakin xuquuqdiisa muwaaddinnimo shantii (5) sano ee la soo dhaafay.

3. Qofka isu sharraxaya xubin Golaha Degaanka waa inuu ku dhashay degmada uu iska sharraxayo ama uu degganaa tobankii(10) sano ee u danbeeyey.

# Madaxa V

# HANNAAANKA MAAMULKA PUNTLAND

## Qaybta 1aad
## ADEEGYADA RAYADAKA

### Qodobka 123aad
### SHAQAALAHA RAYADKA AH EE DAWLADDA

1. Hawlwadeennada dawladda iyo shaqaalaha rayadka ahi waxay u adeegaan dadweynaha iyo dawladda Puntland umana daneeyaan garabyo siyaasadeed iyo koox gaar ah, waxaana ay xilkooda u gutaan si waafaqsan dastuurka iyo sharciyada Puntland. Waa reebbantahay in xafiisyada dawladda loo isticmaalo ujeeddooyin siyaasadeed iyo dana gaar ah.

2. Hawlawadeenada iyo shaqaalaha dawladda waxaa lagu qaadanayaa mutaysiga iyo kartida wax qabad ee qofka shaqa doonka ah, loogumana kala eexan karo tixgelin la xariirta kala raacsanaanta siyaasadaha jira, sokeeyennimo iyo xiriirro saaxiibtinimo dartood.

3. Qof kasta oo ah shaqaale dawladeed waxaa loo tixgelinayaa horumarka uu ka sameeyo shaqada uu hayo. Sharci gaar ah ayaa lagu maamulayaa habraacyada shaqa qorista, kala astaynta jagooyinka, dalacaadaha, tababarka, ruqsaynta, xuquuqda iyo dhammaan arrimaha kale oo ku saabsan shaqaalaha dawladda.

4. Sharciga ayaa caddaynaya hawlwadeennada aan xisbiyada siyaasadda ka qaban Karin mansabyo hoggaamineed.

### Qodobka 124aad
### MABAADI'DA MAAMUL WANAAGGA

Dhammaan hawlwadeennada iyo shaqaalaha dawladdu waxay xilalkooda u gudanayaan si waafaqsan mabaadi'da soo socota:

(a) Waxay ku go'aan qaadanayaan si waafaqsan danaha guud oo aan ku xirnayn dan gaar ah.

(b) Waa inay ka taxaddaraan xaalad saamayn khaldan ku yeelan karata xil gudashadooda, amaba shaki gelin karta hufnaantooda.

(c) go'aannada waxaa lagu salaynayaa oo keliya muhimadda ay u leeyihiin xilgudashada oo keliya.

(d) Qof kasta oo ah hawl-wadeen ama shaqaale dawladeed waa lagula xisaabtamayaa natiijooyinka ka dhasha go'aannada uu ka qaato wax qabadkiisa, waana inuu fududeeyo baaritaannada hawlahiisa oo ay wadaan hay'adaha ku shaqada leh.

(e) Go'aannada la qaadanayo iyo hawlaha la fulinayo dhammaantood waa inay noqdaan kuwa aan mugdi iyo mad-madow ku jirin xogtoodana la heli karo.

(f) Hawl-wadeen kasta waa inuu caddeeyo haddii ay jirto dan gaar ah isla markaana uu qaado tallaabooyin uu ku xalliyo marka ay la soo gudboonaadaan arrimo go'aannadiisa saamayn ku yeelan kara.

## Qodobka 125aad

## LUNSASHADA IYO KU TAKRIFALIDDA HANTIDA DAWLADDA

Hawl-wadeen ama shaqaale kasta ee dawladeed oo si xun u maamula, lunsada maaliyad ama hanti dawladeed wuxuu geystay dembi culus wuxuuna mudanayaa ciqaab u dhiganta faldembiyeedka uu galay iyo inuu soo celiyo dhamaan hantidii uu dayacay ama lunsadey.

## Qodobka 126aad

## XASAANADAHA

1. Xasaanad waxaa leh qaar ka mid ah mas'uuliyiinta dawladda si ay uga badbaadaan eedayn la maleegay ama cadaadis sharci darro ah iyaga oo mas'uuliyiintaasu gudanaya hawlihii ay u xilsaarnaayayeen.

2. Ma jirto hay'ad awood u leh inay eedayso ama xirto Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku Xigeenka haddii aan la marin habraacyada sharci ee ku cad qodobka 81aad.

3. Xubin kasta oo ka mid ah Golaha wakiillada lama xiri karo, lamana baari karo jirkiisa, degaankiisa xafiiskiisa, iyo gaadidka uu markaas wato, lagumana oogi karo dacwado dembiyo culus laga bilaabo maalinta la doorto ilaa uu ka dhammaysto muddada la doortay ama uu is casilo, haddii aan Golaha Wakiilladu ka xayuubin xasaanadda. Dembiyada iyo khaladaadka aan cuslayn oo ay galaan xubnaha Golaha wakiilladu inta ay xilka hayaan looma xiri karo loogumana yeeri karo inay maxkamadda horteeda qiraal ka baxshaan,marka laga reebo dacwadaha madaniga ah.

4. Dhammaan hawlwadeennada Golaha Wakiilladu doorto ama oggolaado magacaabiddooda waxay leeyihiin xasaanad, sidaas darteedna lama xiri karo, lamana baari karo jirkiisa, degaankiisa, iyo gaadiidka uu markaas wato, dacwadna laguma oogi karo haddii aan Xeer Ilaaliyaha Guud Golaha Wakiillada weydiisan in Xasaanadda laga xayuubiyo. Haddii Goluhu ku qanco inuu jiro fal dembiyeed ciqaab lagu mudan karo, waa la hakinayaa xilkiisa waxaana la horgeynayaa maxkamadda raacfaanka ee heer gobol si ay xukun ku habboon uga gaarto faldembiyedka lagu eedeyay.

5. Garsoorayaasha Maxkamada rafcaanka iyo kuwa derejada koowaad lama xiri karo haddi aan lagu qaban iyagoo fal-dembiyeed gacanta kula jira, degaankooda iyo gaadiidkoodana lama baari karo, dacwadna laguma oogi karo haddii aan

guddiga sare ee garsoorku oggolaan codsi ka yimi xeer ilaaliyaha guud oo la xariira in xasaandda laga qaado.

6. Hadii mas'uul ka mid ah kuwa ku xusan faqradaha 2,3,4 ee qodobkan la qabto iyaga oo fal-dembiyed gacanta kula jira waxaa la wargelinayaa Guddoomiyaha Golaha Wakiillada, hoggaanka golaha ayaana go'aan ka gaaraya meesha lagu haynayo tan iyo inta la dhammaystirayo habraaca lagu go'aaminayo in xasaanadda laga qaado iyo in kale. Haddii masu'uulka la qabto yahay garsoore waxaa loo gacangelinayaa Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.

7. Guddoomiyayaasha Gobollada iyo xubnaha golayaasha degaanka waa la eedayn karaa, hase ahaatee waxaa la horgeynayaa maxkamadda racfaanka iyada oo aan la marin tan darajada koowaad.

## Qodobka 127$^{aad}$

## DHAARTA DASTUURIGA AH

Qof kasta oo xil sare ka qabanaya Dawladda Puntland Maxkamadda Sare ayaa u dhaarinaysa xilka loo dhiibey inta uusan xilka qaban, wuxuuna marayaa dhaartan:

"Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay in aan Diinta Islaamka xurmeeyo, Dastuurka dalka Puntland iyo qawaaniintiisa dhawro, xilka la ii dhiibay daacadnimo u guto, dalka iyo dadkiisana Lillaahi ugu adeego"

# Qaybta 2$^{aad}$

# MAALIYADDA DAWLADDA

## Qodobka 128$^{aad}$

## HANTIDA DAWLADDA

Hantida Dawladda Puntland waxay ka koobantahay dhamman:

(a) Lacagaha ay dawladdu leedahay.

(b) Deymaha taagan oo laga qabo dawladda.

(c) Hantida dawladdu ku hesho dhaqangelinta sharciyada dhaqaalaha puntland.

(d) xuquuqda dawladdu ku heli karto dhaqangelinta sharciyada cashuuraha, iyo sidoo kale tabbarucaadyada sharcigu jideeyo.

(e) isu dheellitirka amaahda lagu leeyahay iyo deymaha ay leeday dawladdu.

## Qodobka 129$^{aad}$

## MAS'UULIYADDA ILAALINTA HANTIDA IYO MAALIYADDA DAWLADDA

1. Dhammaan dadweynaha Puntland waxaa waajib ku ah ilaalinta iyo dhawridda hantida Puntland.

2. Hawl-wadeennada iyo shaqalaha dawladda waxaa waajib gaar ahi ka saaranyahay xannaanaynta hantida dawladda oo ay masu'uulka ka yihiin.

3. Madaxda maamulka ee hay'ad kasta oo dawladeed ee heer Puntland, gobol iyo degmo ayay saarantahay ma'uuliyadda sharci ee dhaqngelinta waajibaadka ku xusan faqradaha 1,2 ee qodobkan.

4. Wasaaradda Maaliyadda iyo Hanti-Dhawrka Guud ayaa sharci ahaan masu'uul ka noqonaya ilaalinta hantida iyo maaliyadda dawladda.

5. Qaybta fulinta ee dawladda oo u adeegsanaysa Wasaaradda Maaliyadda ayaa ka mas'uul ah maaraynta maaliyadda dawladda.

## Qodobka 130aad
## MIISAANIYADDA DAWLADDA

1. Miisaaniyadda dawladdu waa sharci qeexaya dhammaan dakhliyada iyo kharashyada loo qoondeeyay in dawladdu gasho sanad maaliyadeedka, kuwasoo lagama maarmaan u ah fulinta barnaamijyada dawladda.

2. Sanad maaliyadeedka Puntland wuxuu bilawadaa 1da kowda Bisha Jannaayo wuxuuna dhammaadaa 31ka Disember ee isla sanadkaas.

3. Wakaaladaha madaxa bannaan ee dawladda, iyo hay'ad kasta oo gebi ahaan iyo qayb ahaanba lagu maalgeliyo hanti dawladeed waxay yeelanayaan miisaaniyad u gaar ah oo ku lammaan miisaanniyadda guud ee Puntland, waxaana meel-marinaya Golaha Wakiillada.

4. Sharci gaar ah ayaa tilmaamaya diyaarinta, habraaca oggolaanshaha, dhaqangelinta, iyo warbixinta natiijada dhaqangelidda miisaaniyadda.

5. Sabab kasta awgeed, haddii dhammadka sannad maaliyadeed la gaaro ayada oo aan Golaha wakiilladu oggolaan miisaaniyadda sannadka cusub waxaa lagu sii dhaqmayaa miisaniyadda sannadkii la soo dhaafay inta Golaha wakiilladu ka ansixinayo miisaaniyadda cusub.

## Qodobka 131aad
## HABRACA MIISAANIYADDA

1. Miisaaniyadda dawladda ee ku talo galka ah waxaa soo diyaariya wasiirka maaliyadda isaga oo ku saleynaya qorshayaasha ay soo jeediyeen wasiirrada iyo madaxda hay'adaha kale iyo xogaha ay isu soo ururiyeen khubarada iyo howl-wadeenada wasaaradda maaliyadda, waana in uu soo hordhigo golaha xukuumadda mashruuca miisaaniyadda ugu dambeyn 30ka sibtembar ee sannadka ka horreeya sannadka loogu talagalay ku dhaqankeeda.

2. Mashruuca miisaaniyadda golaha xukuumadu oggolaado oo ay la socoto warbixinta wasiirka maaliyaddu waa in la hordhigo golaha wakiillada ugu

dambeyn labo bilood ka hor dhamaadka sannadka ka horeeya  sannadka loogu talo galay ku dhaqankeeda.

### Qodobka 132$^{aad}$

### XISAAB XIRKA SANNAD MAALIYADEEDKA

Xisaab xirka sannad maaliyadeed kasta waa in Wasaaradda Maaliyaddu horgeyso golaha wakiillada ugu dambeyn 30ka juun ee sannadka xiga si uu uga doodo ka dibna u ansixiyo ama u diido.

# Madaxa VI

# GACANSARRAYNTA IYO WAX KA BEDDELIDDA DASTUURKA IYO QODOBKA MARXALADDA KALA GUURKA

### Qodobka 133$^{aad}$

### DOORKA SHARCI EE DASTURKA

1. Inta laga dhammaystirayo Dastuurka Jamhuuriyadda Federalka ee Soomaaliya, Dastuurka Puntland waa sharciga ugu sarreeya Puntland.marka laga reebo shareecada Islaamka,

2. Sharci, xeer hoosaad iyo wareegto kasta ee fulineed oo ka soo horjeeda dastuurka Puntland waa waxba kama jiraan.

3. Maxkamadda Dastuuriga ayaa ilaalinaysa inaan qofna xuquuqdiisa lagu xadgudbin. Sharci gaara ayaa qeexaya sida Maxkamadda Dastuurigu u gudanayso xilkaas.

### Qodobka 134$^{aad}$

### WAX KA BEDDELIDDA DASTUURKA

1. Hindisaha wax ka beddelidda dastuurka waxaa soo jeedin kara:
   (a) shan meelood oo meel (1/5) xubnaha Golaha Wakillada.
   (b) Golaha Xukuumadda.
   (c) shan kun (5000) oo muwaaddiniin ah.

2. Marka hindisaha wax ka beddelidda dasturku soo gaaro fadhiga guud ee golaha, waxaa ka baarandegaya guddi gaar ah oo ay ku dhanyihiin garabyada siyaasadeed ee goluhu ka koobanyahay. Goluhu isaga oo ka duulaya talada ay soo jeediyaan guddiga gaarka ah ee loo saaray wuxuu ka doodayaa hindisaha wax ka beddelidda dastuurka wuxuuna ku oggolaanaya aqlabiyad kala bar iyo hal ah ee xubnaha baarlamaanka.

3. Golaha Wakiilladu wuxuu bilaabayaa ololе warbaahin iyo doodo si loo xaqiijiyo ka qaybgal dadweyne oo ballaaran ee hinidsaha wax ka beddelidda dastuurka.

4. Ugu yaraan hal bil ka dib, marka goluhu gaaro meel-marinta koowaad ee hindisaha wax ka beddelidda dastuurka, ayaa Goluhu codayn labaad u qaadayaa si uu u siiyo meel-marin kama dambays ah oo u baahanaysa saddex meelood oo labo (2/3) xubnaha baarlamaanka.

5. Wax ka beddelid kasta oo la xariirta qodobbada 1, 2,3,8 iyo xubinta koowaad ee Qaybta koowaad ee madaxa II ee dastuurka waxaa wax lagaga beddeli karaa oo keliya afti dadweyne, si waafaqsan sharciga aftida ee puntland.

6. Wax ka beddelida dastuurka waxaa lagu baahinayaa Faafinta Rasmiga ah loomana cuskan karo diidmada qayaxan ee Madaxweynaha.

## Qodobka 135aad

## ISWAAFAJINTA DASTUURKA PUNTLAND IYO DASTUURKA JAMHUURIYAD FEDERAAL AH EE SOOMAALIYA

1. Marka dadweynaha Soomaaliyeed afti ku meelmariyo Dastuurka Jamhuuriyadda federalka Soomaaliya, ayaa Golaha Wakiillada ee Puntland wuxuu magacaabayaa guddi gaar ah oo ka kooban xisbiyada Siyaasadda ee Puntland si ay dib u eegid ugu sameeyaan dastuurka Puntland una hubsadaan arrimaha ay ku kala geddisanyihiin labada dastuur.

2. Guddiga gaarka ah ee dib u eegidda daasturka Puntland wuxuu dastuurka Puntland waafajinayaa kan federaalka iyada oo laga duulayo in dastuurka federalku mudnaanta leeyahay.

3. Guddiga gaarka ah ee dib u eegidda dastuurka Puntland wuxuu la tashanayaa Golaha Fulinta, Maxkamadda dastuuriga iyo Xeer Ilaaliyaha Guud iyo masu'uul kasta ama qof kasta oo uu u arko inuu tala ku biiranayo inta lagu gudajiro isku dubbarididda talooyinka wax ka beddelidda dastuurka Puntland.

4. Guddiga Gaarka ah ee dib u eegista dastuurka Puntland hindisaha is waafajinta labada dastuur wuxuu u bandhigaya Golaha Wakillada si uu uga doodo uguna oggolaado cod aqlabiyad ah, loomana cuskan karo Qod.134 ee dastuurka. Hoggaanka Golaha wakiilladu wuxuu faafinayaa is beddellada dastuurka Puntland lagu sameeyay waxaana lagu kaydinayaa diiwaannada xogta ee Dawladda Puntland.

5. Waa reebbantahay in guddiga gaarka loo adeegsado wax ka beddelidda dasturka ee ka baxsan iswaafajinta dastuurka federaalka ah iyo kan Puntland.

## Qodobka 136aad
## DHAQANGALKA DASTUURKA

Dastuurka Dawlad Goboleedka Puntland wuxuu dhaqangal noqonayaa siddeed (8) beri ka dib marka afti dadweyne lagu meelmariyo.

Waxaa hubiyey:
Xoghayaha Guddiga Dastuurka
ABDIRAHMAN A. KABOSHAGLE

Waxaa oggolaaday:
Guddoomiyaha Guddiga dastuurka
MOHAMED HASSAN MOHAMED

# Lifaaq 1

## MARXALADDA KALA GUURKA

1. Guddiga Doorashada Puntland ee ugu horreeya waa ku meel gaar, wxuuna ka koobnaanayaa shan (5) xubnood oo isugu jira laba uu Madaxweynuhu magacaabo Golaha wakiilladuna ansixiyo iyo saddex Golaha Wakiilladu toos u magacaabo.

2. Guuddigu wuxuu u xilsaaranyahay qabashada Aftida dastuurka iyo doorashooyinka Golayaasha Deagaanka ee ugu horreeya, xilkiisuna wuxuu ku egyahay ku dhawaaqidda natiijooyinka doorashooyinka Golayaasha Degaanka iyo sharciyaynta xisbiyada siyaasadda.

3. Inta lagu jiro muddada xilhayntiisa Guddigu wuxuu leeyahay awoodaha ku cad Qodobka 114 ee dastuurka Puntland.

4. Marka ay dhammato muddada xilhaynta Guddiga Koowaad waxaa loo dooranayaa Guudiga Doorashada Puntland ee rasmiga ah, si waafaqsan Xubinta afraad ee Qaybta IV ee Madaxa IV ee dastuurka Puntland